# Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ismaamulka Gobolladda iyo Degmooyinka, Xeer Lr. 23/2019

## TUSMADA XEERKA

Wareegto Madaxweyne (23/12/2019)

**CUTUBKA 1AAD QODOBO GUUD**
Qodobka 1aad Magaca Xeerka
Qodobka 2aad Macnaha Erey Bixinta
Qodobka 3aad Ujeedooyinka Xeerka
Qodobka 4aad Mabaadii'da Xeerka
Qodobka 5aad Xayn-Daabka Adeegsiga Xeerka
Qodobka 6aad Qaab-Dhismeedka Dalka
Qodobka 7aad Shuruudaha Lagu Magacaabi Karo Gobol ama Degmo
Qodobka 8aad Shuruudaha Qiimeynta
Qodobka 9aad Gobolada Iyo Degmooyinka JSL
Qodobka 10aad Darajooyinka Degmooyinka Dalka JSL
Qodobka 11aad Xuduudaha Gobolada iyo Soohdimaha Degmooyinka

**CUTUBKA 2AAD WAX KA BEDELKA GOBOLADA IYO DEGMOOYINKA XUDUUDAHOODA**
Qodobka 12aad Qiimayn Iyo Darajo Ka Bedelid Degmo
Qodobka 13aad Kala Xadeynta Xuduudaha Gobolada & Soohdimaha Degmooyinka

**CUTUBKA 3AAD AWOODDA IS-MAAMULKA**
Qodobka 14aad Wax Ka Beddilidda Qaab Dhismeedka Dalka
Qodobka 15aad Baahinta Awoodda Ismaamulka
Qodobka 16aad Gole Gobol
Qodobka 17aad Xilka Golayaasha Gobolka
Qodobka 18aad Xilka Iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Gobolka
Qodobka 19aad Xilka Gudoomiye Xigeenka Gobolka
Qodobka 20aad Xilka Iyo Waajibaadka Xoghaye Fulin Gobol
Qodobka 21aad Xidhiidhka Laamaha Dawladda Dhexe Ee Heer Degmo Iyo Golaha Deegaanka

**CUTUBKA 4AAD GOLAYAASHA DEGMOOYINKA**
Qodobka 22aad Xubnaha Golayaasha Degmooyinka
Qodobka 23aad Doorashada Mudanayaasha
Qodobka 24aad Muddada Xilka Golaha
Qodobka 25aad Waajibaadka Mudanaha
Qodobka 26aad Diiwaangalinta Hantida Mudanayaasha
Qodobka 27aad Xeer Hoosaadka Mudaneyaasha
Qodobka 28aad Xasaanada Xubinta Golaha
Qodobka 29aad Waayidda iyo Bannaanaanshaha Xubinimada Mudanaha
Qodobka 30aad Eedaynta Xubinimada Mudanaha
Qodobka 31aad Jagada Bannaanaatay

Qodobka 32aad Istiqaaladda Xubinta Mudanaha Ah
Qodobka 33aad Kala Diridda Golaha
Qodobka 34aad Mudadda Kala Guurka

**CUTUBKA 5AAD DHISMAHA IYO XILKA GOLAHA DEEGAANKA**
Qodobka 35aad Dhismaha Golaha Deegaanka
Qodobka 36aad Guddiga Fulinta
Qodobka 37aad Guddiga Joogtada
Qodobka 38aad Dhismaha Guddi Hoosaadyada Golaha Deegaanka
Qodobka 39aad Guddi Tuulo
Qodobka 40aadXilka Golaha Deegaanka
Qodobka 41aad Xadidaada Awoodda Golaha
Qodobka 42aad Xilka Guddiga Fulinta Golaha Deegaanka Degmada.
Qodobka 43aad Xilka Guddida Joogtada Ah
Qodobka 44aad Xilka Iyo Awoodda Guddoomiyaha Degmada Ahna Duqa D/Hoose
Qodobka 45aad Xilka Ku-Xigeenka Duqa
Qodobka 46aad Waajibaadka Guddi Hoosaadka Golaha Deegaanka
Qodobka 47aad Waxa Ka Reeban Guddi Hoosaadka
Qodobka 48aad Xilka Xoghayaha Fulinta
Qodobka 49aad Magcaabida Iyo Xil Ka Qaadista Xoghayaha Fulinta
Qodobka 50aad Mushaharka & Gunnada Xilka Xoghayaha Fulinta

**CUTUBKA 6AAD KULAMADA, SHIRARKA IYO XEERHOOSAADYADA**
Qodobka 51aad Kulamada Golaha Deegaanka
Qodobka 52aad Guddoominta Shirarka
Qodobka 53aad Qabsoomidda Shirarka Gudida Fulinta
Qodobka 54aad Shirarka Caadiga Ah Ee Golaha
Qodobka 55aad Kooramka Iyo Go'aamada Shirarka
Qodobka 56aad Hadalqoraallada Shirarka
Qodobka 57aad Habka Shirarka Golaha Iyo Guddiyadiisa Kale
Qodobka 58aad Awoodda Dejinta Xeer Hoosaadka
Qodobka 59aad Gudbinta Xeer Hoosaadka
Qodobka 60aad Habka Dejinta Xeer Hoosaadyada
Qodobka 61aad Daabacaada Iyo Kaydinta Xeer Hoosaadyada
Qodobka 62aad Anshaxa Shirarka Iyo Jebinta Xeer Hoosaadyada
Qodobka 63aad Awoodda Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dejinta Xeer Hoosaad
Qodobka 64aad Gunnada Golaha
Qodobka 65aad Awoodda Golaha Degaanka ee Xeer-dejinta

**CUTUBKA 7AAD DOORASHOOYINKA GUDOOMIYAHA DEGMADA AHNA DUQA D/HOOSE IYO KUXIGEENKIISA**
Qodobka 66aad Dhaarta Mudanayaasha Golaha
Qodobka 67aad Habka Doorashada Guddoomiyaha Ahna Duqa Iyo Ku Xigeenkiisa
Qodobka 68aad Muddada Duqa Iyo Ku-Xigeenkiisa
Qodobka 69aad Gudbinta Waxqabadka Duqa Iyo Ku-Xigeenkiisa
Qodobka 70aad Xil Ka Qaadista Duqa Iyo Ku-Xigeenkiisa

**CUTUBKA 8AAD QAAB DHISMEEDKA MAAMULKA DAWLADAHA HOOSE EE DEGMOOYINKA IYO XILALKOODA.**

Qodobka 71aad Maamulka Dawladda Hoose ee Degmada
Qodobka 72aad Waaxyaha Degmooyinka Darajada "A"
Qodobka 73aad Shaqaalaha Dawlaha Hoose Ee Degmooyinka
Qodobka 74aad Dhismaha Mashaariicda

**CUTUBKA 9AAD ARRIMAHA FARSAMADA IYO ADEEGYADA BULSHADA**
Qodobka 75aad Heshiisyada Farsamada
Qodobka 76aad Goobaha Qalabka Laydhka Iyo Tilfoonada
Qodobka 77aad Gaadiidka Dadweynaha
Qodobka 78aad Gawraca Iyo Sariibadaha
Qodobka 79aad Fayadhowrka
Qodobka 80aad Dab Demiska
Qodobka 81aad Astaamaha Wadooyinka
Qodobka 82aad Qurxinta Iyo Dayactirka
Qodobka 83aad Heegan Galinta Farmasiiyada
Qodobka 84aad Ilaalinta Sicir Goynta
Qodobka 85aad Kala Xadaynta Meheradaha Ganacsiga & Kala Habayntooda
Qodobka 86aad Hay'adaha Maxaliga

**CUTUBKA 10AAD MIISAANIYADDA GOLAYAASHA DEGMOOYINKA**
Qodobka 87aad Dakhliga.
Qodobka 88aad Dibu U Habeynta Cashuuraadka
Qodobka 89aad Nidaamka Qoondaynta Dakhliga Kabka (12.5%)
Qodobka 90aad Diyaarinta Miisaaniyadda
Qodobka 91aad Dib U Eegis Miisaaniyadeed
Qodobka 92aad Xisaab Xidhka Golaha Degmada.
Qodobka 93aad Kala Wareejin Lacageed
Qodobka 94aad Deynta
Qodobka 95aad Xeer Nidaamiyaha Xisaabaadka Iyo Kaydka Hantida Golaha
Qodobka 96aad Awoodda Saxeexa Kharash Bixinta Iyo Hantida Kaydka Golaha
Qodobka 97aad Guddoonka Deeqaha
Qodobka 98aad Xaraashka Hantida Deegaanka
Qodobka 99aad Guddi Sannadeedka Kormeerka Iyo Baadhista. "Annual Board of Survey"
Qodobka 100aad Mas'uuliyadda Xisaabeed
Qodobka 101aad Kormeerka Iyo Baadhista
Qodobka 102aad Heshiisyada Iyo Qandaraasyada
Qodobka 103aad Dhaqangalka Iibka
Qodobka 104aad Gudbinta Saxeexyada

**CUTUBKA 11AAD ARRIMO KALA DUWAN**
Qodobka 105aad Awoodda Dawladda Dhexe
Qodobka 106aad Soo saarista xeer nidaamiyeyaal
Qodobka 107aad Awoodda Guddiyada Baarlamaanka Guddiyada
Qodobka 108aad Baabi'in Ama Laalid
Qodobka 109aad Dhaqan Galka

**JAMHUURIYADDA SOMALILAND**

## Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-436/122019 Taar: 23/12/2019

## Wareegto Madaxweyne

**Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ismaamulka Gobolladda iyo Degmooyinka, Xeer Lr. 23/2019**

Markaan Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobada 75aad ee DatuurkaJamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Wakiillada Go'aan Lr.GW/KF-41/853/2019, ee ku taariikheysan 11/12/2019, ee ay ku ansixiyeen Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Ismaamulka Gobollada iyo Degmooyinka, Xeer Lr. 23/2019;

Waxaan soo-saaray;

Dhaqan-galka Wax-ka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Is- maamulka Gobollada iyo Degmooyinka, Xeer Lr.23/2019.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi
Madaxweynaha
Jamhuuriyadda Somaliland

# Golaha Wakiiladu

**Markuu Arkay**:- Qodobada 109 aad, 110 aad, 111aad iyo 112 aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland.

**Markuu Garowsaday**:- Gol dalooloyinkii xeerkii hore ee ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka iyo sida loogu baahan yahay in lagu sameeyo dib u habayn iyo sixid.

**Markuu Qaderiyey**:- Ahmiyada weyn ee uu leeyahay ismaamulka gobolada iyo degmooyinka iyo baahida loo qabo hoos u daadejinta xukunka.

**Markuu aqoonsaday**:-Siday lama huraan u tahay iswaafajinta nidaamka siyaasadeed ee habka xisbiyada badan iyo habka ismaamulka gobolada iyo degmooyinka.

**Marku kuu qancay**:- In nuxurka xeerkani xambaarsan yahay uu sixid iyo toosinba u noqon karo qaladaadkii iyo murankii hore u jiray.

**Markuu dhagaystay**:- Doodii mudaneyaasha Golaha Wakiilada.

**WUXUU ANSIXIYEY**
**XEERKAN 23/2019**

## CUTUBKA 1AAD
## QODOBO GUUD

### Qodobka 1aad
### Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa loogu yeedhayaa "**Wax-ka-bedelka iyo kaabista Xeerka Ismaamulka Gobolada iyo Degmooyinka JSL Xeer Lr: 23/2019**".

### Qodobka 2aad
### Macnaha Erey Bixinta

**Gobol:** Waxa loola jeedaa Gobolada uu u qaybsan yahay Dalka Jamhuuriyadda Somaliland Ee Xeerkani tilmaamayo.

**Gudoomiye Gobol:** Waxa loo la jeedaa masuulka ugu sareeya Gobolka, kana wakiil ah Dawladda Dhexe.

**Gole Gobol:** Waxaa loola jeeda Gole ka kooban Gudida Fulinta ee Gobolka, Maayarada Degmooyinka ee Gobolka, iyo Madaxda laamaha

Dawlada ee Heer Gobol.

**Gole Degmo:** Waxaa loola jeeda gole ka kooban Gudida Fulinta ee Degmada, Madaxda laamaha dawlada iyo Taliyeyaasha Ciidama ee Heer Degmo.

**Degmo:** Waxa loola jeedaa Degmooyinka ay u qaybsamaan Goboladda Dalka JSL Ee xeerkani tilmaamayo.

**Xuduudaha:** Waxa loola jeedaa xariiqyada khariidada Dalka Ee xadeeya Gobolada Dalka JSL wadaagaan ama Gobol la wadaago Dalalka aynu Jaarka nahay Ee Xeerkani tilmaamay.

**Soohdimaha**: waxa loola jeedaa soohdimaha u dhaxeeya Degmooyinka Dalka Ee xadeeya jiidaha Maamulka Degmada hoos yimaada.

**Gole Deegaan**: Waxa loola jeedaa (Gole Degmo) Xubnaha Dadweynuhu si sharci ah ugu doorteen hogaaminta Maamulka iyo sharci Dejinta Degmada.

**Duqa/Mayor**: waxa loola jeedaa Xubinta Golaha Deegaanka Ee Degmo iska dhex doorteen inuu noqdo Guddoomiyaha Degmada iyo kan Golaha Deegaanka.

**Xoghaye Fulin ee Gobol:** waxaa loola jeeda sarkaalka ugu sareeya maamulka xarunta Gobolka ee uu soomagacaabo Wasiirka Arrimaha Guduhu.

**Xoghaye Fullin Degmo:** Waxa loola jeedaa hawlwadeenka ugu sareeya maamulka dawladda hoose ee degmadda, masuulkaas oo uu soo magacaabo wasiirka wasaaradda Arrimaha Guduhu, Golaha deegaankuna ansixiyo

**Guddoomiyaha Degmada**: Waxa loola jeedaa masuulka guud ee Dawladda ee heer Degmo (District Commissioneer) ahna Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Degmadda (Mayor)

**Taliyaha Saldhiga**: Waxa loola jeedaa Taliyaha ciidanka Booliska ee heer Degmo (District Police Commissioner)

**Wasiir:** waxa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha JSL.

**Wasaaradda Arrimaha Gudaha:** Waxa loola jeedaa Wasaaradda

**Darajooyinka:** Waxa loola jeedaa maqaamka degmo loo qoondeeyay markii laqiimeeyay, waxsoo-saarka shaqaalaha tirada Dadweynaha, baaxada Dhulka IWM. Sida xeerkani tilmaamayo.

**Xeer:** waxaa loola jeedaa xeerkan ismaamulka goboladda iyo degmooyinka.

**Xeer-dejin:** waxaa loo la jeedaa Golayaasha Heer qaran gobol iyo degmooyinka ee

ladoorto, kuwaas oo dejiya xeerarkooda ka horimanayn shuruucda Qaranka.

**Qodobka 3aad**
**Ujeedooyinka Xeerka**

Ujeedooyinka Xeerkani waa: -
1) in Xeerka Is-maamulka Gobollada Iyo Degmooyinka la waafajiyo mabaadii'da ku xusan qodobada 109aad, 110aad, 111aad iyo 112aad ee dastuuurka si Golayaasha degmooyinka dalku ay u noqdaan kuwa awood u leh hanashada adeegyada bulshada iyo horumarinta dhaqaalaha ee degaanadooda.
2) In la Dejiyo sharci saldhig u ah aasaasidda, Xaddidaada xilka, waajibaadka, awooddaha iyo shaqada maamulada gobolada iyo degmooyinka dalka.
3) In la kala xadeeyo awoodaha maamul iyo cashuureed ee Dawlada dhexe iyo degmooyinka, iyo isku xidhkooda si loo suurta-geliyo isku filnaansho degmooyinku ka gaadhaan dhinacyada adeegyada bulsho.

**Qodobka 4aad**
**Mabaadii'da Xeerka**

Mabaadii'da hagaysa xeerku waa:
1) Daadejinta Maamulka adeegyada arrimaha bulshada iyo kuwa horumarineed, looguna wareejiyo dawladaha Hoose awood buuxda, (devolution/Transfer) si adeegyada arrimaha bulshada iyo horumarinta loogu dhaweeyo bulshada rukun asaasiya oo lagu isticmaalo heerarka kala duwan dawlada si loo sugo kaqayb-galka shacabka iyo maamul go'aan wadagaadhis demuqraadiya
3) Diyaarinta iyo horumarinta xeerarka, istiraatiijiyadaha iyo siyaasaddaha maamulada Gobollada iyo degmooyinka iyo Hogaaminta iyo xidhiidhinta
4) Ka midho dhalinta Maamul Wanaaga, kaa soo lama huraan ka dhigaya sidii shaqaalaha dawladu ku noqon lahaayeen Hawlkar waxqabad koodu wacan yahay
5) In maamulka dawliga ah iyo kan siyaasadeedba lakeeno halka adeega bulshada laga gaadhsiiyo, taasi waxay hagaajinaysa la xisaabtanka iyo waxqabadka, waxayna kor u qaadaysaa baahiyaha, adeegyada iyo dareenka bulshada iyo lahaanshiiyaha mashaariicda deegaanadooda laga fuliyo
6) Hagaajinta awooda fulineed ee hawlaha dawladaha hoose sida Qorshaynta, Maalgelinta iyo Maaraynta adeeg gaadhsiinta bulshadii soo dooratay

**Qodobka 5aad**
**Xayn-Daabka Adeegsiga Xeerka.**

Xeerka dib loo habeeyey ee Is-maamulka Gobollada iyo Degmooyinka Xeer.Lr.23/2019 waxa lagu maamulayaa dhamaan maamulada gobolada iyo degmooynka dalka.

**Qodobka 6aad**
**Qaab-Dhismeedka Dalka**

1) Qaab dhismeedka Dalka JSL wuxuu ka kooban yahay una qaybsamaa Gobolo iyo Degmooyin.
2) Caasimada Dalka Jsl waa Hargeysa waxayna yeelan doontaa Xeer u gaar ah.

3) Gobolkii hore loo odhan jiray Waqooyi Galbeed wuxuu magaciisu isu beddelayaa Gobolka Maroodi-jeex.

## Qodobka 7aad
## Shuruudaha Lagu Magacaabi Karo Gobol ama Degmo

Shuruudaha (Criteria) lagu magacaabi karo Gobol ama Degmo waxa waajib ah inay ku salaysnaato buuxinta shuruudaha hoos ku qoran: -

1) Baaxada Dhulka ay ku fadhido.
2) Miisaanka iyo Baaxada Dadweynaha Deegaanka ku nool.
3) Wax soo saarkeeda iyo Khayraadkeeda Dabeeciga ah ee ay leedahay.
4) Isku filaansho iyo hanashada Adeegyada Arrimaha Bulshada, waa in ay degmadu hanan kartaa boqolkiiba lixdan 60% miisaaniyadeeda ugu yaraan.

## Qodobka 8aad
## Shuruudaha Qiimeynta

Faahfaahinta shuruudaha Qiimeynta ee lagu magcaabi karo Gobol iyo Degmo ee ku qoran Qodobka 7aad farqadihiisa 1aad, 2aad, 3aad iyo 4aad ee xeerkan, Wasaarrada Arrimaha Gudaha ayaa ku soo diyaarinaysa Xeer Sharaxaya, waxaanay u gudbinaysaa Golaha wasiiradda waxaana ansixinaya labada Gole Baarlamaan (Wakiilada iyo Guurtida) sida ku cad Dastuurka qodobkiisa 109aad farqadiisa 3aad.

## Qodobka 9aad
## Gobolada Iyo Degmooyinka JSL

1) Jamhuuriyadda Somaliland waxay u qaybsantaa (6) Lix Gobol, lixdaas Gobol oo kala ah: -

a) Gobolka Maroodijeex.
b) Gobolka Togdheer. c) Gobolka Sanaag.
d) Gobolka Awdal.
e) Gobolka Sool.
f) Gobolka Saaxil.

2) Gobolkiibawaxa uu u qaybsamaaDegmooyin darajadoodu kala yihiin A, B, C, D.
3) Magaalo madaxda gobol kasta darajadeedu waa ''A'' waana sidan:

| MAGACA MAGAALO MADAXDA | DARAJADA |
|---|---|
| 1. Hargeysa | '' A '' |
| 2. Burco | '' A '' |
| 3. Ceerigaabo | '' A '' |
| 4. Boorama | '' A '' |
| 5. Laascaanood | '' A '' |
| 6. Berbera | '' A '' |

## Qodobka 10aad
## Darajooyinka Degmooyinka Dalka JSL

1) **GOBOLKA MAROODI-JEEX.**

| No | Magaca Degmada | Darajada |
|---|---|---|

| | | |
|---|---|---|
| 1. | Hargeysa | A |
| 2. | Gabiley | A |
| 3. | Baligubad | C |
| 4. | Salaxlay | C |
| 5. | Farawayne | D |
| 6. | Sabawanaag | D |
| 7. | Cadaaley | D |
| 8. | Daarasalaam | D |
| 9. | Allaybaday | D |
| 10. | Bali-Maataan | D |
| 11. | Laas-geel | D |
| 12. | Wajaale | D |
| 13. | Agabar | D |
| 14. | Geed-Balaadh | D |
| 15. | Arabsiyo | D |
| 16. | Dacarta | D |
| 17. | Gumburaha | D |
| 18. | Saylab-barri | D |
| 19. | Bali-cabane | D |

**2) GOBOLKA TOGDHEER.**

| **No** | **Magaca Degmada** | **Darajada** |
|---|---|---|
| 1. | Burco | A |
| 2. | Oodwayne | B |
| 3. | Buuhoodle | B |
| 4. | Duruqsi | D |
| 5. | Sh. Xasan Geele | D |
| 6. | Qoryaale | D |
| 7. | War-cimraan | D |
| 8. | Qoyta | D |
| 9. | Waraabeeye | D |
| 10. | Qori-lugud | D |
| 11. | Riyo-xidho | D |
| 12. | Rayadab-khaatumo | D |
| 13. | Nasiye | D |
| 14. | Kalbar | D |
| 15. | Fiqi-ayuub | D |
| 16. | Gabo-gabo | D |
| 17. | Dhoqoshay | D |
| 18. | Haro-sheekh | D |
| 19. | Xaaji Saalax | D |
| 20. | Masalaha Gorad | D |
| 21. | Xamar lagu xidh | D |
| 22. | Widh-widh | D |

**3) GOBOLKA SANAAG.**

| No | Magaca Degmada | Darajada |
|---|---|---|
| 1. | Ceergaabo | A |
| 2. | Badhan | B |
| 3. | Ceel-afwayn | B |
| 4. | Laas-qoray | C |
| 5. | Dhahar | C |
| 6. | Gar-adag | C |
| 7. | Xiingalool | D |
| 8. | Maydh | D |
| 9. | Dararwayne | D |
| 10. | Fiqi-fuliye | D |
| 11. | Xiis | D |
| 12. | Yube | D |
| 13. | Yufle | D |
| 14. | Huluul | D |
| 15. | Gudmo-biyo Cas | D |
| 16. | Ceelaayo | D |
| 17. | Laasa-surad | D |
| 18. | Aw-boogays | D |
| 19. | Goof-badarsalaam | D |

**4) GOBOLKA AWDAL.**

| No | Magaca Degmada | Darajada |
|---|---|---|
| 1. | Boorame | A |
| 2. | Saylac | B |
| 3. | Baki | C |
| 4. | Lughaya | C |
| 5. | Dilla | D |
| 6. | Boon | D |
| 7. | Xariirad | D |
| 8. | Garbo-dadar | D |
| 9. | Qol-ujeed | D |
| 10. | Xeego | D |
| 11. | Cali-xaydh | D |
| 12. | Magaalo-cad | D |

**5) GOBOLKA SOOL.**

| No | Magaca Degmada | Darajada |
|---|---|---|
| 1. | Laas-caanood | A |
| 2. | Caynabo | C |
| 3. | Taleex | C |
| 4. | Xudun | C |
| 5. | War-Idaad | D |
| 6. | Ceelal | D |

| | | |
|---|---|---|
| 7. | Dhanaano | D |
| 8. | Oog | D |
| 9. | Ceegaag | D |
| 10. | Wadaamo goo | D |
| 11. | Xalin | D |
| 12. | Boocame | D |
| 13. | Yagoori | D |
| 14. | Kala-baydh | D |
| 15. | Dharkayngeeye | D |
| 16. | Adhicadeeye | D |
| 17. | Bohol | D |
| 18. | Sarmaanyo | D |
| 19. | Shaxda | D |
| 20. | God-aalo | D |
| 21. | Caroolay | D |

**6) GOBOLKA SAAXIL.**

| **No** | **Magaca Degmada** | **Darajada** |
|---|---|---|
| 1. | Bebera | A |
| 2. | Sheekh | C |
| 3. | Mandheera | D |
| 4. | Bulaxaar | D |
| 5. | Xagal | D |
| 6. | Laas-ciidle | D |
| 7. | Go'dawayn | D |
| 8. | Laasa-dawaco | D |

## Qodobka 11aad
## Xuduudaha Gobolada iyo Soohdimaha Degmooyinka

1) Xuduudaha Lixda Gobol Ee JSL ka kooban tahay waxay ku salaysan yihiin Xuduudahii ay lahaan jireen lixdii Degmo Ee Waaweynaa Ee jiray xiligii Ingiriiska ka hor 26/06/1960 Ee kala ahaa Hargeysa, Burco, Ceerigaabo, Laascaanood, Boorama iyo Berbera kuwaas oo isku beddelay Gobolladda JSL hadda ka kooban tahay.
2) Degmooyinkii hore loo magacaabay xiliyadii xukuumadihiii hore ee Soomaaliya kana farcamay lixda Degmo Ee ku Xusan Qodobkan faqradiisa 1aad, waxay noqonayaan xuduudihii Degmooyinka xiligii Ingiriiska Ee ay ka farcameen Ee hadda ah Gobollada JSL, marka laga reebo gobolka Saaxil o ay degmada xagal ku soo biirtay.
3) Degmada Baligubadle oo la magacaabay xiligii halganka iyo Degmada Salaxlay oo lagu go'aamiyey Shirweynihii 3aad ee 1997 ee Beelaha Somaliland, waxay xuduudahoodu ku ekaan doonaan, oo lagu saleeyey goobihii Codbixinta Aftida Dastuurka ee ay ka hawlgaleen.
4) Degmooyinka darajada "D" inta ka horeysa qiimeyntooda iyo sugida kala xadayntooda xukuumaddu waxay u sii magcaabaysaa maamul ka kooban Gudoomiye, Gudoomiye ku xigeen iyo Xoghaye Fulineed.
5) Qiimeynta iyo kala xadaynta degmooyinka "D", Wasaaradda Arrimaha Guduhu

waa in ay ku soo dhamaystirtaa muddo dhan **laba sano (2) gudahood** oo ka bilaabanta taariikhda dhaqan-galka kaabista iyo wax ka beddelka Xeerkan, iyada oo loo raacayo shuruudaha ku cad Qodobka 7aad ee Xeerkan, Xuduudaha Dagmooyinkaasina waxay noqonayaan 5 km oo dhinac walba ah, kana bilaabmaya xarunta Dagmada, inta Wasaaradu soo dhamaystirayso qiimayntooda.
6) Degmooyinka darajada "D" waxa loo samayn doonaa Golayaal Deegaan marka Xuduudahooda la sugo dib u qiimayn Degmona lagu sameeyo Goleyaashuna Ansixiyaan.
7) Degmo kasta oo la magacaabo waxay xuduudaheedu ku jirayaan xuduudihii Gobolka iyo soodimihii Degmada ay ka farcantay, sida ku cad farqadaha kala ah 1, 2 iyo 3 ee Qodobkan.

## CUTUBKA 2AAD
## WAX KA BEDELKA GOBOLADA IYO DEGMOOYINKA XUDUUDAHOODA

### Qodobka 12aad
### Qiimayn Iyo Darajo Ka Bedelid Degmo

1) Degmooyinku waxay ku mutaysan karaan darajo bedelid oo noqon karta dallacaad darajo ama hoos u dhigid darajo, ama waayis marka la qiimeeyo iyada oo laga duulaayo **Qodobka 109aad** ee Dastuurka iyo Qodobka 7aad ee Xeerkan.
2) Xukuumadda waxa waajib ku ah inay dib u qiimayn ku samayso Darajooyinka Degmooyinka B iyo C, muddo aan ka badnayn **Laba Sanadood (2)** oo ka bilaabanta taariikhda dhaqangalka kaabista iyo wax ka bedelka xeerkan, una soo gudbiso Golayaasha barlamaanka si uu u ansixiyo.

### Qodobka 13aad
### Kala Xadeynta Xuduudaha Gobolada & Soohdimaha Degmooyinka

Kala xadeynta Xudduudaha Gobollada iyo Soohdimaha Degmooyinku waa xilka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, iyada oo kaashanaysa Wasaaraddaha iyo Hay'addaha Qaranka ee qaabka farsamo u soo geli kara, waxana ogolaanaya Golaha Barlamaanka.

## CUTUBKA 3AAD
## AWOODDA IS-MAAMULKA

### Qodobka 14aad
### Wax Ka Beddilidda Qaab Dhismeedka Dalka

Wax ka bedelka tirada Gobollada iyo Degmooyinka ama xuduudahooda iyada oo sababaysan waxa soo jeedinaya Golaha Xukuumadda waxaana oggolaanaya Golaha Wakiilada iyo Golaha Guurtida sida ku qeexan Qodobka 109aad, Farqadiisa 3aad ee dastuurka dalka.

### Qodobka 15aad
### Baahinta Awoodda Ismaamulka

1) Iyada oo laga duulayo qodobada **110aad, 111aad (4) iyo 112aad** ee dastuurka JSL, Golayaasha Degaannada Degmooyinka ee darajada "A" iyo "B" waxay ka masuul

noqonayaan hanashada adeegyada horumarineed ee dhammaan qaybaha dhulka ay degmooyinkaasi ka kooban yihiin.

2) Iyada oo aan waxba loo dhimayn mas'uuliyadda ku xusan farqada 1aad ee qodobkan; adeegyada horumarineed ee degmooyinka darajada "A" iyo "B" ay ka mas'uul yihiin waxa ka mid ah:

a) Xarumaha daryeelka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ee degmooyinka,
b) Dugsiyada wax-barshada ee ilaa heer dugsi hoose/dhexe ee degmooyinka
c) Xannaanada xoolaha ee heer degmo
d) Horumarinta beeraha iyo adeega fidinta beeraha ee heer degmo
e) Horumarinta ganacsiga ee heer degmo
f) Horumnarinta dhalinyarada iyo ciyaaraha ee heer degmo.
g) Ilaalinta deegaanka heer degmo
h) Nabadgelyada gudaha ee kusiman awooda heer degmo
i) Wadooyinka gudaha magaalooyinka heer degmo.
j) Horumarinta biyaha iyo adeega Fidinta heer dagmo.
k) Horumarinta isgaadhsiinta iyo adeega fidinta heer dagmo.

3) Adeegyada ku xusan farqada 2aad ee qodobkan, golayaasha degmooyiinka darajada "**A**" iyo "**B**" waxay awood u leeyihiin maamulka, dhismaha, dayactirka iyo daryeelka adeegyadaasi.

4) Masuuliyada Golayaasha Deegaanada Degmooyinka ee darajada (**C**) ee adeegyada ku xusan farqada 2aad ee qodobkan waxay ku xidhnaanaysaa awooda maamul iyo maaliyadeed ee degmooyinkaasi hadba heerka ay Maamul daadajinta.

## Qodobka 16aad
## Gole Gobol

1) Inta laga soo dooranayo Gole Gobol, Gobol kastaa wuxuu yeelanayaa Guddi fulin iyo Gole hor'umarineed.

2) Guddiga Fulintu waxay ka kooban tahay:

| | |
|---|---|
| a) Guddoomiye Gobol | Guddoomiye |
| b) Guddoomiye ku Xigeen Gobol | Xubin |
| c) Xoghayaha Fulinta Gobolka | Xoghay |

3) Golaha Horumarinta Gobolku wuxuu ka kooban yahay.

| | |
|---|---|
| a) Gudoomiyaha Gobolka | Guddoomiye. |
| b) Gudoomiye ku-Xigeenka Gobolka | Xubin |
| c) Xoghayaha Fulinta Gobolka | Xoghaye. |
| d) Guddoomiyayaasha Degmooyinka Gobolka | Xubno |
| e) Madaxda Laamaha Dawladda Ee Gobolka | Xubno oo kala talin doona xag farsamo oo aan cod ahayn. |

4) Guddiga Fulinta Gobolka ee ku xusan farqada 2aad ee qodobkan waxaa soo magacaabaya Xukuumadda Dhexe, waxaana loo magacaabayaa sida ku cad Qodobka **111aad,** Farqadiisa 5aad ee Dastuurka.

5) Guddoomiyaha iyo Guddoomiye ku-xigenka Gobolka waxa magacaabaya isla markaana xilka ka qaadi Kara Madaxweynaha ka dib marka uu la tashado Wasiirka Arrimaha Gudaha. isla markaana xilka ka qaadi Kara Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha kaddib marka uu la tashado Guddoomiyaha Gobolka.

## Qodobka 17aad
## Xilka Golayaasha Gobolka

1) Go'aaminta Arrimaha Siyaasadeed, dhaqaale, Maamul iyo Nabadgalyo iyo Hor'umarineed Ee saameeya Gobolka.
2) Dib u eegid Miisaaniyaddaha Degmooyinka Gobolka.
3) Adkaynta Nabadgelyada iyo Suggida Amaanka.
4) Dib u eegid go'aamada Maamul iyo Siyaasadeed Ee Degmooyinka Gobolka.
5) Dhex-dhexaadinta Degmooyinka iyo Bulshada Gobolka.
6) Dhismaha guddi hoosaadyo Goluhu u wakiilan karo hawl gaar ah.

## Qodobka 18aad
## Xilka Iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Gobolka

Guddoomiyaha Gobolku waa xidhiidhiyaha Xukuumadda dhexe iyo Degmooyinka Gobolka isaga oo hoos imanaaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Waajibaadka iyo xilkiisuna yahay sida tan: -

1) Inuu horumariyo ama gaadhsiiyo Gobolka iyo Degmooyinkiisa Siyaasadda Dawladda Dhexe Ee ku wajahan dhaqaalaha, Bulshada, Nabadgalyada iyo Maamulkaba.
2) Inuu hogaamiyo Waaxaha Gobolka Ee ka wakiilka ah Wasaarradaha iyo Hay'addaha D/Dhexe isaga oo kormeeraya qorshayaashooda wax qabad.
3) Fulinta iyo Dabagalka meel marinta Shuruucda Qaranka.
4) Dhex-dhexaadinta Degmooyinka iyo magacaabidda Guddiga dhexdhexaadinta ee heer Gobol ah.
5) Xidhiidhinta iyo diyaarinta warbixin Goboleedka.
6) Xidhiidhinta D/Dhexe iyo Maamulka Gobolka iyo Degmooyinka.
7) Soo jeedinta xil u dhiibista iyo ka qaadista Mas'uulinta Laamaha Dawladda ee heer Gobol iyo Degmo.
8) Ka warbixinta Madaxda Wasaaradaha, Hay'addaha Qaranka Ee heer Gobol iyo Degmo.
9) Guddoominta Fadhiyada Golaha Gobolka.
10) Nabadgalyada & Kormeerka Gobolka.
11) Waa madaxa Hay'adaha nabadgelyada iyo maamulka ee heer gobol.
12) Guddoomiyaha Gobolku waa in uu saxeexo kharashyda isuduweyaasha D/dhexe.
13) Hubinta iyo kormeerka mashaariicda dawladaha hoose ay fuliyaan
14) Xukuumada dhexe waxa ku waajib ah in ay guddoomiyayaasha gobolada u qoondayso miisaaniyad ku filan xil gudashada waajibaadkooda shaqo.

## Qodobka 19aad
## Xilka Gudoomiye Xigeenka Gobolka

Xilka iyo waajibadka guddoomiye ku-xigeenka Gobolka waxa ka mid ah:

1) Gudashada xilka Guddoomiyaha Gobolku markasta oo uu maqan yahay & marka ay bannaanaato jagada Guddoomiyuhu.
2) Wuxuu ka caawinayaa guddoomiyaha gobolka gudashada iyo habaynta hawlaha shaqo ee gobolka.
3) Gudashada waajibaadka kale ee Guddoomiyuhu u igmado.

## Qodobka 20aad
## Xilka Iyo Waajibaadka Xoghaye Fulin Gobol

1) Hagista Maamulka & Maaliyadda, Kormeerka iyo la socodka wax qabadka Shaqaalaha Xarunta Gobolka iyo hawlgalka dhamaan Hay'addaha Gobolka (Kuwa Madaxa bannaana iyo kuwa kaleba).
2) Qabashadda iyo Maaraynta hawlaha uu u xilsaaro Guddoomiyuhu.
3) Diyaarinta Warbixinada Gobolka.
4) Dabagalka warbixinada Gobolka

## Qodobka 21aad
## Xidhiidhka Laamaha Dawladda Dhexe Ee Heer Degmo Iyo Golaha Deegaanka

1) Wasaaradaha iyo Hay'adaha Dawladda dhexe ee bixiya adeegyada horumarka dhaqaalaha iyo arrimaha bulshadu waxay shaqooyinkooda iyo awoodohooda u dhaadhicinayaan ilaa heer degmo si bulshada loogu dhaweeyo adeegyada isla markaana loogu saleeyo xaaladaha iyo baahiyaha dhabta ah ee ka jirta Deegaannada ay ka kooban yihiin degmooyinka dalku.
2) Si loo hiragliyo dhaadhicinta awoodaha ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan, Wasaaradaha iyo hay'adaha bixiya adeegyada horumarka dhaqaalaha iyo arrimaha bulshada waxa waajib ku ah in xafiisyo heer degmo ah ka hirgaliyaan degmooyinka dalka, iyaga oo ka duulaya siyaasadda xukuumadda ee maamul-daadajinta.
3) Wasaaradaha iyo hay'adaha waxa kale oo ku wajib ah in ay dhaadhiciyaan miisaaniyaddii adeegyadaasi heer degmo iyada oo miisaaniyadasina ay qayb ka noqonayso miisaaniyadda Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinka.
4) Iyada oo ay wada shaqayn la leeyihiin wasaaradohooda, xafiisyada Wasaaradaha Dawladda dhexe ee heer degmo waxay si toos ah u hoos tagayaan, maamul ahaan Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinka, kuwaasi oo ku yeelanaya awoodahan;
   a) Maamulka xafiisyada Dawladda dhexe ee Degmooyinka
   b) Diyaarinta iyo ansixinta qorshayaasha horumarrineed ee xafiisyada heer degmo
   c) Maamulka shaqaalaha xafiisyada heer degmo
   d) Kormeerka iyo dabagalka qorshayaasha iyo shaqooyinka laamaha dawladda dhexe ee Degmooyinka.

## CUTUBKA 4AAD
## GOLAYAASHA DEGMOOYINKA

## Qodobka 22aad
## Xubnaha Golayaasha Degmooyinka

1. Xubnaha Golayaasha Deegaanka waxa loogu yeedhayaa Xubin Gole Deegaan (Councilor)
2. Tirada Mudanayaasha Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinku waxay ku salaysan yihiin darajooyinkooda oo kala ah: -

| | | |
|---|---|---|
| 1. Degmada Hargeysa | "A" | 17 Xubin Gole Deegaan |
| 2. Degmooyinka Darajada | "A" | 13 Xubin Gole Deegaan |
| 3. Degmooyinka Darajada | "B" | 11 Xubin Gole Deegaan |
| 4. Degmooyinka Darajada | "C" | 9 Xubin Gole Deegaan. |
| 5. Degmooyinka darajada | "D" | 7 Xubin Gole Deegaan (waxay yeelanayaan goleyaal deegaan marka la ansixiyo) |

## Qodobka 23aad
## Doorashada Mudanayaasha

1) Doorashada Mudanayaasha Gobolladda iyo Degmooyinka JSL waxa lagu dhaqayaa Xeerka Doorashooyinka Ee markaas dhaqan galka ah.
2) Golayaasha Deegaamadu xil gudashadoodu waa tabaruc mana yeelanayaan hawl maalmeed joogto ah marka laga reebo Guddiga Fulinta iyo guddida joogatada ah.
3) Golayaasha Deegaanku waxay ku iman doonaan Tartan doorashooyin ee Nidaamka Saddexda Xisbi Qaran Ee loolanka Golayaasha Deegaanka.

## Qodobka 24aad
## Muddada Xilka Golaha

1) Mudada Xilka Mudaneyaasha Golaha Degmada waa shan (5) sanno oo ka bilaabmanta maalinta Maxkamaddu Go'aanka doorashada ku dhawaaqdo.
2) Xilka Golehii hore ee Degamdu, wuxuu ku egyahay (14) Afar iyo toban maalmood ka dib, maalinta Maxkamaddu ku dhawaaqdo Go'aanka Doorashada Mudanayaasha cusub.
3) Inta Duqa iyo Ku-Xigeenkiisa cusub la soo dooranayo waxa xilka sii haynaya Xubnihii Guddiga fulinta ee hore, balse waxa ka reeban:
   a) Qandaraas bixin qalab, Gaadiid, iyo maalgalin mashaariiceed.
   b) Xaraash amba bixin Hanti Golaha Degmadu leeyahay.
   c) Shaqaale qoris, Dallacaad, Beddelaad iyo Ruqsayn.
   d) Magacaabis Guddiyo ama Saraakiil.
   e) Saxeex heshiis Dawladda hoose dhinac ka tahay.
   f) Bixinta iyo sharciyaynta jagooyin cusub.
   g) Gelida kharashyada ka baxsan kuwa joogtada ah sida mushaharka, gunada shaqaalaha, shidaalka iwm.
4) Xubnaha mudanayaasha cusub ee golayaasha degaanka degmooyinku, waa in ay ku soo doortaan gudoomiyaha iyo gudoomiye kuxigeenka degmada mudo dhan 14 cisho gudohood oo ka bilaabanta maalinta ay Maxkamaddu ku dhawaaqdo Go'aanka Doorashada Mudanayaasha cusub.

## Qodobka 25aad
## Waajibaadka Mudanaha.

1) Mudanaha la doortay waxaa ku waajibay u feejignaanta iyo la socodka baahida iyo tabashada dadweynaha, Xilna ka saaran yahay inuu u soo gudbiyo Golaha Deegaanka ee uu ka tirsan yahay.
2) Wacyigelinta iyo xidhiidhinta dadweynaha asaga oo ku hanuuninaya kaalinta kaga aadan ay kaga jiraan horumarinta Deegaankooda.
3) Inuu hormood ka noqdo, u horseedo, abaabulo arrimaha daryeelka iyo horumarinta Bulshada sida Caafimaadka waxbarashada, Biyaha, Laydhka, Nadaafadda Guud I.W.M.
4) Isaga oo raaacaya xeerarka iyo shuruucda dalka u yaala, goleyaasha deegaanka in uu si daacadnimo, Xilkasnimo iyo wadaniyad leh u fuliyo waajibaadka iyo xilka ka saran xubinimada Golaha Deegaanka.

## Qodobka 26aad
## Diiwaangalinta Hantida Mudanayaasha.

1) Mudanuhu, wuxuu bil gudaheed marka la doorto, ku diiwaangelinayaa hantida uu leeyahay mood iyo noolba.
2) Xoghayaha Fulintu wuxuu samaynayaa, ilaalinayaa, kaydinayaa diiwaanka hantida mudanayaasha. Wuxuuna nuqul u soo gudbinayaa Wasaarrada Arrimaha Gudaha.

## Qodobka 27aad
## Xeer Hoosaadka Mudaneyaasha.

1) Golaha Deegaanku wuxuu diyaarinayaa Xeer Hoosaad la xidhiidha hab dhaqanka laga rabo mudaneyaasha.
2) Marka Xeer Hoosaadka la diyaariyo, waxa ansixinaya Golaha Deegaanka waxaana loo soo gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo Xeer midaynaya Degmooyinka dalka soo saaraya.
3) Marka Xeer-hoosaadka la ansixiyo ka dib waxa waajib ku ah dhammaan mudaneyaashu inay ku dhaqmaan.

## Qodobka 28aad
## Xasaanada Xubinta Golaha.

1) Xubinta Golaha cabiraada fikirkiisa iyo aragtidiisa waa u xor.
2) Way ka reeban tahay xukunkaas farqada 1aad ee Qodobkan wixii cay ah ama aflagaado ah ee xubintu geysato.
3) Xubinta Golaha lama qaban karo haddii aan oggolaansho laga haysan Golaha ama aanu fal dambiyeed faraha kula jirin si waafaqsan habka xeerka ciqaabta.
4) Xubin gole Hay'addaha baadhistu way u yeedhan karaan haddii hawl baadhiseed ka soo gasho.

## Qodobka 29aad
## Waayidda iyo Bannaanaanshaha Xubinimada Mudanaha

1. Shuruudaha ka reeban laguna waayi karo xubinimada Golaha Degmada waxaa ka mid ah:
    a. Haddii Shuruud ka mid ah shuruudihii lagu soo doortay ay burto.
    b. Haddii uu ku koco musuq-maasuq, lunsi hanti qaran, laaluush, eex, Qabyaalad iyo qaraabo kiil.
    c. Haddii uu abuuro ama ka qayb-qaato hawlo lid ku ah Nabadgelyada iyo Xasiloonida qaranka.
    d. Haddii uu Ku dhaco xukun Ciqaabeed oo Kama dambays ah oo Maxkamadeed.
    e. Haddii uu la yimaado anshax xumo diineed ama mid dhaqan
2. Hadii ay dhacdo in lagu kacay mid ka mid ah shuruudaha ku xusan farqada 1aad ee qodobkan, ugu yaraan **1/3** xubnaha goluhu waxay u gudbinayaan qoraal ay ku saxeexan yihiin iyo caddaymeheeda gudoomiyaha gobolka
3. Guddoomiyaha gobolku marka uu helo qoraalka ku xusan farqada 2aad ee qodobkan waxa uu u gudbinayaa wasaaradda arrimaha gudaha, isaga oo ka dalbanaya wasaaradda, guddi heer qaran ah oo baadha eedaynaha Xubinta Golaha.
4. Hadii natiijada gudida heer qaran ay tilmaanto in lagu kacay falalka ku xusan farqada 1aad xarfaha (b, c and e) waxa loo gudbinayaa xeer ilaalinta heer gobol ee degmadu ka tirsan tahay oo ka gudan doonta tallabooyinka ku haboon si sharciga

waafaqsan.

5. Xubinimada Golaha Degaanka ee degmadu waxay ku bannaanaankartaa mid ka mid ah shuruudahan:

a) Hadii Xubinka Geeri ku timaado.

b) Hadii uu ku dhoco xannuun suurtagalin waaya gudashada xilkiisa oo Guddiga Dhakhaatiirta Gobolku caddayso.

c) Hadii uu istiqaalad qoraal ah keeno, iskiina shaqada uga tago, Goluhuna ogolaado.

d) Haddii uu xil kale oo qaran qabto ama loo magacaabo. Isaguna ogolaasho qoraal rasmi ah ku ogolaado.

e) Hadii xubintu u hoggaansami waayo ama uu jabiyo Xeer Hoosaadka Golaha Degmada, sida; u ololaynta ka faa'iidaysi dan gaar ahaaneed xubinimadiisa. Kadib arintaasina Goluhuna ku ansixiyo kala badh mid lagu daray tirada Guud.

f) Hadii xubintu ka maqanaado Golaha (10) toban fadhi oo isku xiga Sabab la'aan, goluhuna ku ansixiyo kala badh mid lagu daray tirada Guud.

## Qodobka 30aad
## Eedaynta Xubinimada Mudanaha

1) Xubnihii la doortay Xubin ka mid ah haddii lagu soo oogo dacwad lid ku ah xubinimadiisa waxaa loo maraya Maxkamadda ay khusayso.

2) Xisbina ma bedelan karo xubin Golaha Deegaanka ah haddii aanay ku sifoobin shuruudaha ku cad Qodobka.29aad ee xeerkan.

## Qodobka 31aad
## Jagada Bannaanaatay.

1) Xoghayaha Fulintu wuxuu diiwaangelinayaa, una bandhigayaa Duqa Xubnaha jagooyinkoodu bannaanaadeen si waafaqsan qodobka 29aad ee xeerkan.

2) Marka ay jago bannaanaato, waxaa jagadaas lagu soo buuxinayaa hal Bil gudaheed, laga soo bilaabo taariikhdii Duqu ku dhawaaqay Jagadaas bannaanaatay.

3) Jagadaas bannaanaatay waxaa soo buuxinaya xisbigii laga soo doortay xubinihii murashixiinta tartantay ka hadhay ee dhacay, sida ay u kala horeeyaan si waafaqsan xeerka doorashooyinka guud ee qaranka.

## Qodobka 32aad
## Istiqaaladda Xubinta Mudanaha Ah.

1) Mudanuhu wuu iska casili karaa Xilka isaga oo istiqaalad qoraal sababaysan u gudbinaya Duqa Degmada, waxaana ansixinaya Duqa Degmada, ka dib markuu oggolaansho ka helo Golaha Deegaanka.

2) Xubinta istiqaaladda dhiibtay, goluhuna ka aqbalay, wuxuu Duqa Degmadu qoraal toos ah u soo gudbinayaa Guddoomiyaha Gobolka oo u gudbin doona Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ku soo saari doona Wareegto Wasiir una gudbin doona Guddiga doorashooyinka, xisbigii uu ka tirsanaa si loo soo buuxiyo Jagada banaanaatay, lana waafajiyo sharciga xubinta banaanaatay iyadoo la marinaayo Maxkamada Gobolka ee ay khusayso oo leh sharciyaynta iyo Diiwaangalinta.

## Qodobka 33aad
## Kala Diridda Golaha.

1) Golayaasha degmooyinka dalka waa la kala diri karaa iyagoon dhamaysan mudadii xilkooda sida uu dhigayo qodobka 111aad firaqdiisa 8aad ee dastuuurka dalku.
2) Xaaladdaha lagu kala diri karo iyo qaabka loo kala diri karo waxa ka mid ah:
   a) Marka ay (3) kalfadhi oo is xiga sabab la'aan, Degmooyinka Darajada "A" & "B" fadhiyadoodu u qabsoomi waayaan. Degmooyinka Darajooyinka C, & D hadii 4 Kalfadhi oo isku xiga sabab la'aan u qabsoomi waayaan.
   b) Marka ay (1/3) xubnaha Goluhu soo jeediyaan (2/3) na ansixiyaan.
   c) Marka Guddi qaran oo gaara ah oo madax banaan oo madaxweynuhu u magacaabay xilka kala diridda ay soo baadhaan gefafka dhacay ee lidka ku ah xilgudashadooda warbixin iyo talooyin cadna ka keenaan.
   d) Marka Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Guduhu uu ku qanco, hubiyana xaqiijinta inay gudan waayeen waajibaadkii loo doortay, Wasiirku wuxuu soo jeedinayaa in la kala diro Golaha, una gudbiyo Madaxweynaha oo leh Awoodda kama dambaysta ah ee kala diridooda, iyada oo loo marayo maxkammadda awooda u leh kala diridooda ee Heer gobol.

## Qodobka 34aad
## Mudadda Kala Guurka.

1) Mudadda kala guurka ah ee u dhaxaysa taariikhda Golihii hore la kala diray inta laga soo dooranayo Golaha Cusub waxaa Xilka sii haynaya Xoghayaha Fulinta ee Degmada, sida uu dhigayo qodobka 111aad firqadiisa 9aad ee Dastuurku.

# CUTUBKA 5AAD
# DHISMAHA IYO XILKA GOLAHA DEEGAANKA

## Qodobka 35aad
## Dhismaha Golaha Deegaanka

Golaha Deegaanka wuxuu yeelanayaa:
   a) Guddiga Fulinta
   b) Guddiga Joogtada iyo
   c) Guddi Hoosaadyo iyo guddiyo tuulooyin oo hoos yimaadda Golaha Deegaanka Degmada

## Qodobka 36aad
## Guddiga Fulinta.

Guddiga fulinta Golaha Deegaanka Degmada waxay ka kooban yihiin: -

| | |
|---|---|
| 1. Duqa Degmada | Guddoomiye |
| 2. Ku-Xigeenka Duqa Degmada | ku-Xigeen |
| 3. Xoghayaha Fulinta | Xoghaye |

## Qodobka 37aad
## Guddiga Joogtada.

Guddiga joogtada ah ee Golaha Deegaanka Degmadu waxay ka kooban tahay: -
   1. Duqa Degmada.

2. Ku-Xigeenka Duqa Degmada.
3. Xoghayaha Fulinta.
4. Guddoomiyeyaasha Guddi hoosaadyada Golaha Degmada.

## Qodobka 38aad
## Dhismaha Guddi Hoosaadyada Golaha Deegaanka.

1). Golaha Deegaanka ee Degmooyinka Darajada "A" & "B" waxay yeelanayaan saddex Guddi Hoosaad oo kala ah: -

a) Guddiga horumarinta Dhaqaalaha iyo Maaliyadda oo u xilsaaran inay taageero ka siiso Golayaasha Degaanka arrimaha ay ka mid yihiin;
   I. Diyaarinta qorshaha horumarinta dhaqaalaha ee golaha degaanka.
   II. Kobcinta dhaqaalaha iyo hirgelinta mashaariicda
   III. Dib u eegista & talo ka bixinta Xisaab xidhka
   IV. Isku xidhka iyo dhiirigelinta Mashaariicda isku tashiga
   V. Abuuridda Ilo dhaqaale oo cusub
   VI. Dib u eegista & dabagalka miisaaniyadda.
   VII. Fulinta waajibaadyada kale ee ay siiyaan xeer- hoosaadka golaha degaanka ee degmadu si waafaqsan xeerkan.

b) Guddiga Nabadgelyada iyo Arrimaha Bulshada oo u xil saran inay taageero ka siiso Golayaasha Degaanka arrimaha ay ka mid yihiin;
   I. Nabadgelyada dhex-dhexaadinta iyo xallinta khilaafaadka ka soo dhex baxa Degmada
   II. La socodka, la xisaabtanka iyo ka warbixinta hay'adaha nabadgelyada ee heer Degmo.
   III. Diyaarinta qorshaha nabadgalyada ee degmada, iyo daraasaynta isu dhacyada iyo waxyaabaha keena nabadgelyo darrada ee degmada.
   IV. Ururinta xogaha la xidhiidha adeegyada arrimaha bulshada
   V. Diyaarinta qorsheeyaasha la xidhiidha horumarinta adeegyada bulshada ee degmada sida; Caafimaadka, Waxbarashada, Beeeraha, Xoolaha, Deegaanka, iwm ee hoos yimaada awooda maamul ee golaha degaanka degmada.
   VI. Diyaarinta qorshayaasha fayadhawrka iyo bilicda magaalooyinka degmada.
   VII. Fulinta waajibaadyada kale ee ay siiyaan xeer- hoosaadka golaha degaanka ee degmadu si waafaqsan xeerkan.

c) Gudida Hawlaha Guud iyo Jidadka oo u xilsaaraninay taageero ka siiso Golayaasha Degaanka arrimaha ay ka mid yihiin;
   I. Diyaarinta qorshaha lagu hirgalinayo maamulka iyo bixinta jagooyinka dhulka magaalooyinka si waafaqsan naqshada guud ee magaalada ee uu sameeyey xafiiska naqshadaha ee wasaarada hawlaha guud ayna ansixisayeen Guddiga Qaranka ee naqshadaha guud isla markaana lagu dhaqan galiyay xeer madaxweyne.
   II. Diyaarinta qorsheyaasha dhismaha iyo dayactirka wadooyinka magalooyinka degmada iyo ku dabagalkooda marka goluhu ansixiyo.
   III. Diyaarinta qorsheyaasha dhismaha, dayactirka iyo maamulka dhismayaasha uu leeyahay golaha degaanka ee degmadu.
   IV. Kor u qaado dakhliga laga helo adeegyada waaxda.
   V. Xaqiijinta in bulshada magaalooyinka degmadu helaan jidad isku xidha.
   VI. Xaqiijinta in hantida guurtada ah iyo tan maguurtada ah ee degmada la xafiday.
   VII. Hirgalinta in dhamaan mashaariicda lagu hirgaliyo nidaamka ka qayb-galka

dadweynaha.
VIII. Fulinta waajibaadyada kale ee ay siiyaan xeer- hoosaadka golaha degaanka ee degmadu si waafaqsan xeerkan.

## Qodobka 39aad
## Guddi Tuulo

1) Xubnaha Golaha Maamul ee Tuulada waxa soo jeedinaya Gudoomiyaha Degmada isagoo la tashanaya Ganacsatada, Odayaasha & Waxgaradka Tuulada, waxana ogolaanaya Golaha Deegaanka.
2) Tirada Guddiyada tuulooyinka waa inaanay ka badan (7) xubnood, waxaanay isu sii qaybin karaan guddi Hoosaadyo.

## Qodobka 40aad
## Xilka Golaha Deegaanka

1) Golaha Deegaanka wuxuu awood buuxda u leeyahay hawl kasta oo ka mid ah kuwa lagu tilmaamay qodobkan oo looga fadhiyo ka midho dhalintiisa ee ku jira xadka Degmadooda, sida:

a) Xoojinta iyo kor u qaadista Nabadda, deganaanshaha, kala dambaynta iyo wanaajinta awaamiirta Dawliga ah.
b) Kobcinta iyo kor u qaadista kaabayaasha dhaqaalaha sida jidadka magaalooyinka gudahooda.
c) Maamulka, horumarinta iyo kor u qaadista adeegyada Arrimaha Bulshada, sida waxbarashada, Caafimaadka, Beeraha, Xoolaha, Degaanka, Ganacsiga, Nabadgelyada, Laydhka, Biyaha, Igaadhsiinta, Nadaafadda I.W.M ee hoos yimaada awooda golayaasha degaanka ee degmooyinka.
d) Maamulka, iyo horumarinta fayadhawrka, bilicda, Dhiraynta, iyo dhismaha, dayactirka iyo daryeeelka wadooyinka magaalooyinka iyo kaabayaasha dhaqaalaha I.W.M ee dawladaha hoose ee maamulka degmooyinka.
e) Aasaasida suuqyo badeeco, xoolaha iyo Kaluunka
f) Kormeerka dhismooyinka cusub, kuwa la cusboonaysiinayo iyo kuwa u baahan in la dumiyo.
g) Ka hor tagga dhibaatada abaarta, duufaanada, dabka halista ah iyo dhibaato kasta oo wax u dhimi karta dadweynaha.
h) Daad guraynta dadweynaha hadii aafo dhacdo.
i) Diyaarinta iyo fulinta barnaamijyada iyo Mashaariicda horumarineed ee heer degmo.
j) Horumarinta Fanka, Isboortiga iyo Suugaanta.
k) Dhismo goobo biyood oo magaalooyinka iyo tuulooyinka dhexdooda ah.
l) Samaynta iyo dayac tirka wadooyinka.
m) Soo jeedinta iyo codsiga wax ka beddalka iyo habaynta Naqshadda magaalooyinka Degmadu ka kooban tahay si waafaqsan xeerarka maamulka dhulka magaalooyinka.
n) Diwaan galinta hantida ma guurtada ah ee dadweynaha Degmada ku nool iyo tan Dawladaba, ee hoos yimaada masuuliyada golaha degaanka degmada.
o) Diwaan galinta hantida ma guurtada ah ee dadweynaha Degmada ku nool iyo tan Dawladaba, ee hoos yimaada masuuliyada golaha degaanka degmada.
p) Noolaynta Shacaa'iirta Islaamiga ah, wadaniga iyo Caalamiga.
q) Diyaarinta iyo oggolaanshaha dib u eegista

Miisaaniyadda D/Hoose.

r) Daryeelka Horumarinta Miyiga iyo dhiirigelinta wax soo Saarka iyo abaabulidda

s) Dhiirigelinta Mashaariicda isku tashiga Bulshada

t) Habaynta Hawlaha aaska (Qubuuraha) astaynta dhulka Qabuuraha.

u) Samayn goobo nasasho, wax akhris iyo Daawasho.

v) Isku dheeli tirka baahida shaqo xadaynta, qorshaynta iyo jaangoynya shaqaalaha ka hawl gelaya waaxyaha D/Hoose, iyadoo laga duulayo hadba heerka shaqaale iyo Darajada Degmo kasta.

w) Ilaalinta iyo Daryeelka Goobaha taariikhiga ah.

x) Dhiiri galinta Madax Banaanaynta (Privatisation) iyo maal galinta wadjireed (Joint Venture) ee dawlada iyo shirkadaha gaarka ah ee adeegyada Bulshada sida Biyaha, Nalka Iwm.

2. Golayaasha Deegaanka ee Degmooyinku si ay u fuliyaan xilkooda ku xusan farqadda 1aad ee qodobkan, waa in ay sameeyaan qorshaha horumarinta ee degmada.

3. Goluhu waa in uu dejiyaa qorshe sannadle ah oo ku wajahan horumarinta iyo kor u qaadida adeegyada Arrimaha bulshada sida; Nabadgalyda, Dhaqaalaha, Waxbarshada, Caafimadka, kaabayaasha dhaqaalaha, horumarinta Beeraha iyo Xoolaha, Ilaalinta Deegaanka, iwm ee hoos yimaada awooda Golaha Deegaanka Degmada, lana jaan qaadaya qorshaha horumarinta ee heer Qaran.

4. Goluhu wuxuu awood u leeyahay inuu qorshihiisa isbedel ku sameeyo, isaga oo la jaanqaadaya xawliga horumarka Dalka JSl.

5. Goluhu markuu qorshihiisa wax ka bedalayo, waxa uu tixgalinayaa kala mudnaanta baahiyaha degmada sidoo kalana waafajinayaa barnaamijka Qorshaynta Qaranka.

6. Goluhu wuxuu awood u leeyahay inuu heshiis la galo ciddii faa'iido ugu jirto dalka debediisa iyo gudihiisaba iyadoo la waafajinayo shuruucda dalka u dejisan.

## Qodobka 41aad
## Xadidaada Awoodda Golaha.

1) Maamulka gobollada iyo degmooyinka waa qayb ka mid ah maamulka xukuumada Jamhuuriyadda Somaliland sida ku cad qodobka 110aad ee dastuurka qaranka.

## Qodobka 42aad
## Xilka Guddiga Fulinta Golaha Deegaanka Degmada.

Xilka Guddiga fulinta Golaha Deegaanka waxa uu yahay:

1) Fulinta hawl maalmeedka maamulka ee Degmada

2) Kormeerka iyo hubinta habsami u socodka hawlaha Degmada.

3) Fulinta meel marinta iyo dhaqangelinta Go'aanda Golaha Deegaanka Degmada.

4) Fulinta shuruucda, Xeerarka, iyo Go'aamada iyo amarada ka soo fula guddiga joogtada Golaha Deegaanka Degmada iyo xukuumada.

5) Diyaarinta fulinta iyo ku dhaqanka Miisaaniyadda.

6) Dhaqangelinta meelmarinta iyo kormeerka mashaariicda horumarineed.

7) Diyaarin warbixino fulineed ee hawlaha qabsoomay kalfadhiyada dhexdooda iyo wixii aan qabsoomin usoo bandhigidooda Guddida joogatada ah.

8) Usoo bandhigida guddida joogatda amarada degdeg ah ee ka soo baxa Xukuumadda ee aan sugi karayn kalfadhiga Golaha.

9) Awoodaha Guddiga Fulinta ee Golaha waxaa ka mid ah: -

a) Isticmaalka kharashyada.

b) Maamulka iyo bixinta jagooyinka dhulka magaalooyinka si waafaqsan naqshada guud ee magaalada, kuna dhaqmaya sharciga maamulka dhulka magaalooyinka. Si waafaqsan Xeer lambar 17/2001.

c) Soo jeedin cashuur Dejin, Kordhin, Dhimis, qiimayn iyo khidmad saarida liisamada ay awooda u leeyihiin, iyo adeegyada kale, iyaga oo u gudbinaya Wasaarada Arrimaha Gudaha si uu Ansixiyo Golaha Wakiiladu.

d) Waxay heshiisyo la gali karaan cid kasta oo dani dhex-mari karto wixii heer Degmo ah, Si waafqsan xeerarka dalka.

e) Waxay la xidhiidhi karaan macaamilna la yeelan karaan Shirkad, qof iyo wixii ka badan ee khuseeya xilkooda iyagoo u raacaya habka Qandaraas bixinta ee Xeerka Qandaraasyada Qaran.

f) Waxay matali karaan cid kasta iyo hawl kasta oo qayb ay ka tahay D/Hoose.

g) Waxay bixin karaan shaqaale, qalab, Adeeg iyo hoy mar kasta oo baahi timaado dan guud awgeed, waxaana u ansixinaya Gudiga Joogtada ah iyo Wasiirka Arrimaha Gudaha, iyagoo hanti-dhowrka guud lagu wargalinayo.

10) Dejinta iyo usoo jeedinta golaha qorista shaqaalaha D/Hoose ee Shaqaalaha joogatda ah iyo kuwa aan joogtada ahaynba.

11) Ogolaanshaha fasaxa xubnaha Golaha Degaanka.

## Qodobka 43aad
## Xilka Guddida Joogtada Ah.

1) Xilka guddida joogtada ah ee Golaha Deegaanka Degmada waxay si ku meel gaadh ah u soo saarayaan go'aano muddada u dhaxaysa kal-fadhiyada Golaha Deegaanka

2) Waxay yeelanayaan Fadhiyo muddada u dhaxaysa kalfadhiyada caadiga ah ee Golaha Deegaanku u dhan yahay, waxay si ku meel gaadh ah awood u leeyihiin iney go'aan ka gaadhaan arrimaha xaasaasiga ah, lama filaanka ah ee aan sugi karayn kal fadhiga caadiga ah, sida nabadgelyo, siyaaso iyo maamulba ee kaga yimaadda: -

a) Xagga Xukuumadda

b) Guddi hoosaadka Golaha Deegaanka

c) Dhinaca maamulka ama dareenka iyo rabitaanka dadweynaha arrimaha ka soo jeeda.

d) Arrimaha lama filaanka ah sida aafooyinka I.W.M

3) Guddida joogtada ah ee Golaha Deegaanka waxay go'aannadii ku meel gaadhka ahaa ee ay gaadheen u gudbinayaan golaha loo wada dhan yahay fadhigiisa ugu soo horeeya.

4) Waxay Ogolaanayaan Fasaxa Duqa iyo Ku Xigeenkiisa.

## Qodobka 44aad
## Xilka Iyo Awoodda Guddoomiyaha Degmada Ahna Duqa D/Hoose

1. Waa Gudoomiyaha Golaha Deegaanka Degmada ahna Duqa (Mayer) dawlada hoose iyo guddomiyaha laamaha dawlada dhexe ee heer degmo

2. Si uu u guto xilka iyo awoodaha ku xusan farqada 1aad ee qodobkan Guddoomiyuhu;

A. Wuxuu Shirguddoomiyaa Golaha Deegaanka, Guddida Fulinta & Gudida Joogtada ah.

B. Wuxu maamulaa madaxda iyo shaqaalaha Laamaha Dowlada Dhexe ee heer degmo, Wuxuna Guddoomiyaa Fadhiyadooda.

C. Wuxu maamulaa shaqaalaha Dawladda hoose, isla markaana ku daba gala xilgudashada shaqooyinkooda.

D. Waa gudoomiyaha Hay"adaha nabadgelyada ee Heer Degmo.
E. Wuxu hawlgeliyaa Qorshayaasha wax-qabad ee Degmada iyo kuwa dawlada hoose.
F. Wuxuu fuliyaa Go"aammada Golaha degaanka ee degmada.
G. Wuxuu Xidhiidhiyaa Golaha Deegaanka, laamaha Dowlada Dhexe ee Heer Degmo iyo Maamulka Gobolka.
H. Wuxuu Isuduwaa hawlaha kala duwan ee degmada.
I. Wuxuu diyaariyaa qorshayaasha horumarineed ee degmada iyo kuwa dawlada hoose, isla markaana hirgaliyaa u gudbiyaa Golaha Deegaanka ee Degmada si loo ansixiyo.
J. Wuxu ka hawl-galaa hirgalinta qorshayaasha horumarineed ee degmada.
K. Wuxuu ka hawl-galaa ilaalinta iyo sugidda amaanka degmada.
L. Wuxuu maamulaa shaqaalaha laamaha xafiisyada degmada iyo dawlada hoose.
M. Wuxuu ka hawl-galaa qabashada shirarka Golaha Deegaanka, gudida fulinta iyo gudida joogtada ah.
N. Wuxuu ka hawl-galaa kor u qaadida koboca dhaqaalaha ee degmada.
O. Wuxuu hirgaliyaa in miisaaniyada degmada loo isticmaalay si qorshaha iyo sharciga waafaqsan.
P. Wuxuu saxeexaa heshiisyada D/Hoose ee ay dhinac ka tahay.
Q. Wuxuu Oggolaadaa sidoo kalana saxeexaa kharash bixinta (Jeegaga) iyo foojarada.
R. wuxuu soo jeediyaa miisaaniyadda dawlada hoose ee degmada
S. Wuxuu soo jeediyaa, isla markaana horkeenaa Golaha Deegaanka ee degmada qorshayaasha iyo Xeer- hoosaadyada.
T. Wuxuu ku hadlaa magaca Golaha, kana warbixiyaa arrimaha Degmada.
U. Wuxuu ka hawl-galaa in la diyaariyo warbixinaha golaha, ka laamaha dawlada dhexe ee degmada iyo ka dawladda hoose.
V. Wuxuu xubin ka yahay Golaha Horumarinta ee Gobolka.
W. Wuxuu hirgaliyaa gudashada waajibaadyada ay siiyaan xeerkan iyo xeerarka kale ee dalku.

## Qodobka 45aad
## Xilka Ku-Xigeenka Duqa.

1) Xaalad kastaba marka Duqu is casilo, la rido (Xilka laga qaado), maqnaado, bukoodo, geeriyoodo, waxa xilkiisa qabanaya ku-Xigeenka Duqa.
2) Ma banana inuu duqu ku wareejiyo qaybo ka mid ah xilkiisa iyo awoodihiisa cid kale oo aan ahayn ku xigeenkiisa, markay xaalada ku xusan farqada kowaad ee qodobkan timaado.
3) Wixii kale ee hawl ah ee Duqu u idmado ku Xigeenkiisa.

## Qodobka 46aad
## Waajibaadka Guddi Hoosaadka Golaha Deegaanka

Waajibaadka guddi Hoosaad kasta saaran ka sokow, waxay wadaagaan xilalkan: -
1) Kormeerka, hubinta, Dabagalka iyo suggida habsami u socodka go'aanadii ka soo baxay Golaha Deegaanka.
2) Ka tala bixinta toosinta iyo sixidda wixii ka qaloocan waaxyaha maamulka.
3) Dhiirigelinta iyo gacansiinta waaxyaha Dawladda Hoose haddii ay carqalad kala kulmaan meelmarinta go'aanadda Golaha Deegaanka iyo fulinta dhinaca maamulka.

4) Ururinta xogta dadweynaha ee la xidhiidha cabashooyin iyo dacwooyinka ay ka tirsanayaan
Saraakiisha hawlwadeenada Xarunta iyo shaqaalaha Waaxyaha Ee D/hoose.
5) Diyaarinta tabashada Dadweynaha ee xal u helidda iyo wax ka qabadka u baahan kana mid noqon karta qodobada Ajandaha la horgeyn karo Golaha Deegaanka Degmada.

## Qodobka 47aad
## Waxa Ka Reeban Guddi Hoosaadka.

Guddi Hoosaadka Golaha Deegaanka waxaa ka reebban inay: -
1) Inay hawlaha Waaxyaha gacanta ku dhigaan oo la wareegaan hawlsocodsiinta waajibaadka waaxyaha
2) Inay saxeexaan dhokumenti la xidhiidha: -
   a) Dhulbixinta
   b) Mulkiyadaha Dhulka
   c) Waraaqaha Caddaynta, Xaqiijinta, hubinta iyo ansixinta soo eegis dhul.
   d) Buugaagta maamulka lacagta iyo kharash gelida.
3) Amar siin toos ah oo ku wajahan waaxyaha D/Hoose ama goob shaqo iyo shaqaalaha.
4) Samayn Xeer Hoosaad.
5) Samayn Cashuur dhaafid.

## Qodobka 48aad
## Xilka Xoghayaha Fulinta.

1) Xoghayaha Fulinta waa Sarkaalka ugu sarreeya Saraakiisha Maamul fulinta waaxyaha maamulka Degmada, waxanu ka masuul yahay:
a) Xidhiidhinta shaqada waaxyaha iyo qaybinta awaamiirta dawliga ah.
b) Hubinta fulinta Go’aamada Golaha iyo Awaamiirta Duqa Degmada
c) La socodka iyo jaanqaadka waaxyaha iyo hubinta adeega.
d) Soo ururinta iyo hubinta warbixinada waaxyaha.
e) Hubinta iyo dhiirigelinta qorshe hawleedka waaxyaha.
f) Dhiirigelinta go’aan wadaagga madaxda waaxyaha.
g) Hoggaaminta waaxyaha Dawlada Hoose.
h) Ka warbixinta shaqaalaha soo jeedinta qoristooda, dallacsiintooda darajadooda iyo ruqsayntooda.
i) Diyaarinta Miisaaniyadda iyo ku dhaqankeeda.
j) Diyaarinta xisaab-xidhka iyo ka warbixinta dhaqaale.
k) Hubinta iyo kormeerka goobaha Cashuur ururinta iyo Dakhliga.
l) Sugidda, dabagalka iyo ilaalinta hantida Dawladda Hoose Degmada.
m) Hubinta, Saxeexyada foojarada, Jeegaga kharash bixinta iyo gelida saxeexa codsiyada kharashyada caadiga ah ee hawl socodsiinta maamulka Degmada.
n) Wuxuu mas’uul ka yahay diyaarinta ajendayaasha, marka uu la tashato Gudoomiyaha Degmada, Hadalqoraalada Doodda, gudbinta Dokomentiyada, talo bixinta, koobidda nuxurka shirarka ee Golaha, Guddiga Joogtada ah, Guddiga Fulinta iyo kuwa aan joogtada ahayn ee guddi hoosaadyada.
o) Wuxuu mas’uul ka yahay qabashada waajibaad kasta oo sharci ku fadhiya ama amaradda la faray ee uu siiyey Duqa Degmada, Xoghayaha Fulintu isaga oo raacaya

Xeerkan is maamulka Gobollada iyo Degmooyinka ama amarada Golaha, wuxuu leeyahay isticmaalka dhamaan Awoodaha fulineed iyo waxqabad ee Xeerkani siiyey.

## Qodobka 49aad
## Magcaabida Iyo Xil Ka Qaadista Xoghayaha Fulinta

1) Xoghayaha Fulinta ee dawladaha hoose waa sarkaal ka tirsan wasaaradda Arrimaha Gudaha, magacaabistiisa iyo xilka qaadistiisaba waxa iska leh Wasiirka Arrimaha Gudaha.
2) Shuruudaha looga baahan yahay xog-hayaha fulinta ee Dawladaha Hoose waxa ka mid ah:
  a) In uu yahay muwaadiniin reer Somaliland ah.
  b) In aanay da'diisu ka yareyn **35** sano.
  c) Xoghayaha fulinta ee degmooyinka darajada "A" waa in uu leeyahay aqoon/waxbarasho heer jaamacadeed ah, iyo waayo aragnimo shaqo oo la xidhiidha maamulka iyo xisaabaadka oo aan ka yaran **4 sano**.
  d) Xoghayaha fulinta ee degmooyinka darajada "B & C" waa in uu leeyahay waxbarasho heer Diploma ah, ama wax u dhigma sida waayo aragnimo aan ka yarayn **5 sano**.
  e) Waa in aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ciqaab ah, oo maxkamad horteed kaga cadaaday **5 tii sanno** ee u danbeysay.
  f) Waa in uu ku sifoobo xilkas, akhlaaq wanaag, toosnaan isla markaana leeyahay sifo dhexdhexaadnimo, karti iyo daacadnimo.
3) Xoghayaha Fullinta ee degmooyinka waxa xilka lagaga qaadi karaa:
  a) Hadii uu iscasilo lagana aqbalo iscasilaadiisa,
  b) Hadii uu gudan Kari waayo xilkiisa sababo caafimaad darro ama bukaan maskaxeed awgeed oo ay cadeeyeen guddi dhakhaatiir ah oo ka diwaangashan Wasaarada Caafimaadka.
  c) Hadii lagu soo eedeeyoo dambi ciqaab ah oo xadhigiisu gaadhayo muddo sadex (3) Sano ah ama ka badan.
  d) Hadii uu xilka gudan Kari waayo karti darro ama uu ku kaco anshax-xumo, xatooyo, musuq- maasuq, kooxaysi, qabyaalad iwm. Xubnaha golaha degaanka ee degmaduna cod haldheeri xubnaha golaha ah ku soo ansixiyaan arintaasi una soo gudbiyaan Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha.
4) Marka xilka laga qaado xoghaya ama ay bannaanaato jagada xoghayuhu si waafaqsan farqada 1aad ee qodobkan, Wasiirka Wasaarada Arrimaha Gudaha waxa waajib ku ah inuu muddo **14** maalmood Gudahood ah ku dhammaystiro magacaabista Xoghayaha cusub.
5) Muddada la soo magacaabayo xoghayaha cusub waxa hawsha si ku meel-gaadh ah u sii wadaya Agaasimaha Waaxda Maamulka ee D/Hoose ee Degmada.

## Qodobka 50aad
## Mushaharka & Gunnada Xilka Xoghayaha Fulinta.

1) Mushaharka Xoghayaha Fulinta waxay la mid tahay oo ay ku salaysnaan doontaa darajooyinka Shaqaalaha Dawladda Dhexe hadba tii aqoontiisa ku mutaysto oo xaqiininjteeda Wasaradda Arrimaha Guduhu qoraal ku soo saarayso (L.P.C)
2) Gunnada xilka Xoghayaha Fulinta waxaa xadidaaya oo awood u leh Golaha degmada.
3) Gunada wuxuu ku leeyahay oo laga bixinayaa Miisaaniyadda D/hoose ee Degmada.

## CUTUBKA 6AAD
## KULAMADA, SHIRARKA IYO XEERHOOSAADYADA

### Qodobka 51aad
### Kulamada Golaha Deegaanka.

1) Kalfadhiyada Golaayasha Degmooyinka Darajada "A & B" waxa uu qabsoomayaa Labadii biloodba mar, muddada kalfadhiguna waa (20) cisho, Kulamada Guddi hoosaadyaduna waxay ku caddaan doonaan Xeer hoosaadyadooda.
2) Degmooyinka Darajada "C" & "D" wuxuu kalfadhigoodu qabsoomayaa sadexdii biloodba mar, muddada kalfadhiguna waa (10) cisho, Kulamada Guddi hoosaadyaduna waxay ku cadaan doonaan Xeerhoosaadyadooda.
3) Golaha Degmaddu shir aan caadi ahayn waxaa isugu yeedhi Kara: -
   a) Duqa Degmada.
   b) Codsi qoraal ah oo ay soo gudbiyaan xubnaha Golaha Deegaanka oo aan ka yarayn (1/3) tirada xubnaha.
   c) Codsi Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha ka yimaada.
4) Shirka aan caadiga ahayn, sababaha qabashadiisu waa inay ku cadyihiin qoraal, lagu soo cadeeyo Ajendaha shirarkaas.
5) Ajendaha shirka wixii ka baxsan Goluhu way ka doodi karaan haddii mawduuca markaa laga hadlayo uu ka dhasho, ama ugu yaraan 3 mudane soo jeedin qoraal ah ugu soo jeediyaan guddida fullinta, ama xukuumaddu soo jeediso ama uu ku yimaado xaalado kale oo in laga hadlaa muhim tahay.

### Qodobka 52aad
### Guddoominta Shirarka.

1) Kulan kasta oo ay yeeshaan Golaha Degmada, guddida joogtada iyo guddida fullinta waxaa Guddoominaya: -
   a) Duqa Degmada
   b) Ku-Xigeenkiisa marka uu ka maqan yahay Degmada iyo haduu u igmado.
2) Duqa Degmadu 30 Maalmood wax ka badan Safar Dibadeed oo shaqo rasmi ah kuma maqnaan karo, haddii aanay jirin xaalad caafimaad oo qoraal dhakhtar lagu soo cadeeyay.

### Qodobka 53aad
### Qabsoomidda Shirarka Gudida Fulinta.

1) Go'aamada Guddida Fulinta iyo tan Gudida joogtada ah ay gaadhaan waxay dhaqan galayaan marka Duqu ku soo saaro Qaraar Saxeexan.

### Qodobka 54aad
### Shirarka Caadiga Ah Ee Golaha

Shirarka Caadiga ah ee Golaha Degmadu way u furan yihiin markay u oggolaadaan shir guddoonku inay ka soo qaybgalaan xubno sharaf ka tirsan dadweynaha iyo saxaafadda.

### Qodobka 55aad

**Kooramka Iyo Go'aamada Shirarka.**

1. Shirarka Golaha Degmada ama Guddi Hoosaadyadu waxay qabsoomi karaan marka ay xubnaha Golaha iyo Guddi Hoosaadyadu joogaan kala badh hal lagu daray "Quorum".
2. Go'aamada shirarku waxay ku ansaxayaan kala badh hal lagu daray tirada xubnaha fadhiya shirkaas.
3. Qaabka doorashada iyo cod bixintu waxay noqonaysaa Gacan taag, haddii aanay shirgudoonka ama 1/3 xubnaha goluhu soo jeedinin codka qarsoodiga ah, goluhuna ogolaanin.
4. Haddii ay isleekaadaan tirada codadka labada dhinac oo ay sinmaan, Gudoomiyuhu wuxuu yeelanayaa Hal cod (dhinaca uu Raaco), ayayna ku ansaxaysaa.
5. Maayarka Degmadu haddii uu ka qaybgalo shirarka Guddi Hoosaadyada, wuxuu ku leeyahay talo soo jeedin, balse cod dhiibasho kuma laha.

**Qodobka 56aad**
**Hadalqoraallada Shirarka.**

1. Dhammaan sharciyada, Go'aamada iyo hindisayaasha uu ka kooban yahay kulamada Golaha oo dhan waa in la diiwaangeliyaa (Registered).
2. Magacyada mudanayaasha jooga shir kasta ama dadka aan xubnaha ka ahayn ee lagu martiqaaday shirkaas (Goobjoogayaal) waa la diiwaan galinayaa.
3. Hadalqoraalka iyo go'aamada ka soo baxa shirkaas waxaa wada saxeexaya Duqa oo shirguddoonka ah iyo Xoghayaha fulinta.
4. Go'aamada ka soo baxa shirarka Golaha Deegaanka, oo ay ku cad yihiin saxeexyada Duqa iyo Xoghayaha waxay Hay'adaha sharcigu u aqoonsanaysaa markhaati cad oo Rasmi ah.
5. Golaha Deegaanka Degmada waxa ku waajib ah inay dadweynaha u soo bandhigaan Go'aamada ay gaadhaan iyaga oo ku dhejinaya meelaha ogeysiisyada, kana sii daayaan qalabka warbaahinta, haddii ay yihiin arrimaha u baahan gaadhsiinta dadweynaha.
6. Golaha Degmada waxaa ku waajib ah hadal qoraaladda shirarka waa in si degdeg ah (7) todoba Cisho gudahood loogu gudbiyo Guddoomiyaha Gobolka iyadoo nuqulna la siinayo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Nuqulna la siiyo Guddoomiyaha Gobolka.

**Qodobka 57aad**
**Habka Shirarka Golaha Iyo Guddiyadiisa Kale.**

1) Muuqaalka iyo maamuuska fadhiga Goluhu wuxuu u kala baxayaa: -
   a) Shir Guddoonka iyo Xoghaynta oo dhinac ka soo jeedsanaya.
   b) Mudanayaasha Golaha oo ka soo horjeedsanaya shirguddoonka,
   c) Xubno sharafta, Saxaafadda iyo dadweynaha la martigeliyey oo meel gaar ah leh.
2) Ajendaha shirka oo qoran, waxaa qaybinaya Xoghayaha Fulinta, waxaana ka doodaya, ansixinayana golaha.
3) Marka la hubiyo dhammaystirka habsami u socodka iyo tirakoobka mudanayaasha shirka, shir guddoonka ayaa ku dhawaaqaya furitaanka shiraka.
4) Mudanayaasha Golaha ee shirka jooga waxaa waajib ku ah ilaalinta habsami u socodka iyo hoggaaminta shir Guddoonka.
5) Qodobada Ajendaha waxaa looga doodayaa qodob- qodob keli-keli ah.
6) Qodobada Ajendaha waxaa looga doodayaa sida ay u kala horreeyaan.

7) Xubnuhu waa inay si xaqsoor leh u dhegaystaan xubin kasta oo ka hadalka Ajendaha uu shir- Guddoonku siiyo.
8) Qodobka Ajendaha ah ee aan taageero helin (Secondment) cod lama gelin karo, haddiise soo jeedimaha cusubi taageero waayaan lagama doodi karo.
9) Shir guddoonku wuxuu xaqiijinayaa hubinayaana in xubin kasta oo shirka joogtaa ay fursad u hesho ka hadalka Ajendaha haddii uu codsado oo Gacanta taago.
10) Xubin kasta oo ka mid ah mudanayaasha shirka fadhiya way ka Reeban tahay inuu qodob ka hadlo mar wax ka badan, haddii aanay ku saabsanayn amar sixitaan.
11) Xurmada Shirku waa dood, is-dhageysi iyo Asluub wanaag.
12) Xoghayaha Fulintu waa: -

a) Xoghayaha Fulinta isaga ka mas'uul ah dhammaan shirarka Golaha iyo Guddiyaasha iyo ururinta ajendaha iyo diiwaan galinta hadal qoraalada.
b) In kastoo aanu cod ku lahayn wuxuu ku leeyahay tallo soo jeedin buuxda dhinaca shuruucda, Xeerarka iyo maamulka.
c) Sida Xubnaha Golaha oo kale wuxuu xaq u leeyahay in lagu muujiyo hadalqoraalka talada uu soo jeediyo marka ra'yigiisa lagaga bato.
d) Haddii Xoghayaha Fulintu laba shir ama ka badan ku kulmaan siiba guddi hoosaadyada cid ayuu u idman karaa shirarka qaarkood.

## Qodobka 58aad
## Awoodda Dejinta Xeer Hoosaadka.

1. Goluhu wuxuu dejinayaa isla markaasna ansixinayaa Xeer Hoosaadyo ku salaysan arrimaha hoos ku qoran: -

a. Xilka, waajibaadka iyo awoodaha ee Golaha Degmada ee Xeerkan ku xusan.
b. Hawl kasta oo sharci ama xeer kale jideeyey.
c. Arrimo kale oo xukuumadda dhexe waajibisay kuna soo saartay faafin rasmi ah.

2. Baahi badan looma qabo wixii Xeerkan ku cad in Xeer hoosaad lagu soo saaro. Wixii Xeerkan ama Xeerar kale oo qaran ka hor imanaya oo Xeer Hoosaad ahi way burayaan.
3. Xeer Hoosaad kasta oo hore loo dejiyey, wax waa lagu kordhin karaa, waxna waa laga dhimi karaa, waana la badeli karaa.

## Qodobka 59aad
## Gudbinta Xeer Hoosaadka

1. Duqa Degmada iyo Xoghayaha Fulinta waxaa ku waajib ah in nuqul rasmi ah ee Xeerhoosaadka ka soo baxa Golaha loo gudbiyo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
2. Wasiirka Arrimaha Guduhu wuxuu awood u leeyahay inuu xeerhoosaadkii ka hor imanaya Distuurka iyo xeerarka qaranka ku soo celiyo golihii uu kasoo baxay muddo (20) cisho gudahood ah, isagoo raacinaya qoraal muujinaya meelaha uu ka khilaafsanyahay sharciga iyo talo bixinba, si goluhu uu mar labaad u ansixiyo, ka dibna nuqul ka mid ah dib loogu soo celiyo wasiirka.

## Qodobka 60aad
## Habka Dejinta Xeer Hoosaadyada.

1. Ka hor inta aan la dejin Xeer Hoosaad kasta, waxaa Golaha Degmada ku waajib ah inuu si buuxda oo hufan uga baaraandeggo si qoto dheerna looga fekaro saamayntiisa,

dhaxalgalkiisa, noqdona mid u cuntama Dadweynaha.
2. Xeer Hoosaad kasta oo la dejiyo, waa in dadweynaha loo bandhigaa, iyada oo lagu faafinayo faafinta rasmiga ah ee Dawlada (Government Gazetta).

## Qodobka 61aad
## Daabacaada Iyo Kaydinta Xeer Hoosaadyada.

1. Golaha Deegaanka waxa ku waajib ah inay daabacaan Xeer Hoosaadyada kuna soo saaraan faafin rasmi ah.
2. Waxa kale oo ku waajib ah xafidaadda iyo kaydinta Xeer Hoosaadyada, lana siiyo degmada iyo Hay'addaha Dawliga ah ee ay khuseeyso nuqullo.

## Qodobka 62aad
## Anshaxa Shirarka Iyo Jebinta Xeer Hoosaadyada.

1. Mudane kasta ee Golaha egmada waxa ka reeban fal kasta oo carqalad ku ah habsami u socodka shirarka Golayaasha sida: -
   a) Hadal muran ka dhalan karo, Xiisad Abuur iyo qalalaanso gelin Kara.
   b) Kooxaysi.
   c) Af-lagaado
   d) Gacan ka hadal.
   e) Amar diido.
2. Shir guddoonku wuxuu xaq u leehayahay mudanaha ku kaca Arrimaha ku xusan lambarka (1) aad ee qodobkan (Xarafkiis A, B, C, D, iyo E) inuu digniin qoraal ah siiyo.
3. Shirguddoonku wuxuu awood u leeyahay ka joojin hadal ama shir ka saaris marka uu digniin siiyo seddex jeer.
4. Shirguddoonku wuxuu awood u leeyahay in uu diyaariyo anshaxmarin la horgeeyo Guddiga joogtada ah ee Golaha, oo awood u leh Ganaax anshaxmarineed iyo ka joojin shirarka muddo cayiman.
5. Shir Guddoonku markuu dareemo burbur shirka ku yimaada wuxuu xaq u leeyahay in shirka si degdeg ah u xidho ammaankana sugo.
6. Mudanaha ku kaca Gacan ka hadal, ee ku xusan xarafka (d) ee qodobkan lambarkiisa 1aad, wuxuu ku mutaysanayaa anshax Marin culus, sharaf ka xayuubin ama ciqaab Marin waxaana la horgeynayaa Guddiga joogtada ah ee Golaha Deegaanka Degmada iyadoo sharci loo marayo.

## Qodobka 63aad
## Awoodda Wasaaradda Arrimaha Gudaha ee Dejinta Xeer Hoosaad.

1. Golaha Deegaanku hadduu ku guuldarraysto Dejin Xeer Hoosaad, Wasaaradda Arrimaha Guduhu waxay ku leedahay inay siiso talo soo jeedin iyo tilmaan la xidhiidha baahi dejin Xeer Hoosaad.
2. Hadday mar labaad ku guuldarraystaan, tilmaantii iyo tallo soo jeedintii Wasaaradda Arrimaha Gudaha ka dib muddo (45) cisho gudahood, jawaab lagu qancona laga waayo, Wasaaradda Arrimaha Gudaha, waxa u furan inay Xeer Hoosaad ku saabsan arrintii ay tilmaanta ka bixisay, u dejiso.
3. Wasaaradda Arrimaha Guduhu Xeer Hoosaadka ay soo saarto dhaqan galkiisa wuxuu la mid yahay kuwa Golaha Degmadu soo saaray, fulinta iyo ku dhaqankiisuna waa waajib, hadii aanu ka horimanayn Dastuurka qodobkiisa 111aad farqadiisa 10aad ama

shuruucda kale ee qaranka.

**Qodobka 64aad**
**Gunnada Golaha.**

1. Guddoomiyaha Golaha iyo Ku-Xigeenkiisa waxay leeyihiin mushahar iyo Guno xil oo Goluhu u xadido, una ansixiyo.
2. Guddida joogtada ah oo aanay ku jirin xubnaha guddida fullintu waxay yeelanayaa gunno bileed iyo gunno kalfadhi oo goluhu u xadido una ansixiyo.kalfadhi oo Goluhu u xadido, una ansixiyo.
4. Gudi hoosaadyaduna waxay yeelanyaan Gunno kalfadhi oo Goluhu u xadido una ansixiyo.
5. Mudanayaashu markay u baxayaan Safar shaqo rasmiah oo Degmada ka baxsan waxay leeyihiin gunno safar oo Goluhu Oggolaado.
6. Goluhu wuxuu gunnooyinka kalfadhiyadaas ku soo sarayaa Xeer Hoosaad, Nuqulana loo kala gubiyo Gudoomiyaha Gobolka, wasiirka Arrimaha Gudaha iyo Hanti dhawraha Guud si ay ula socdaan.
7. Shardi waxa Golaha ku ah in xadaynta Gunnooyinka Kalfadhiyadu ku salysnaato awoodooda dhaqaale ee Degmada.

**Qodobka 65aad**
**Awoodda Golaha Degaanka ee Xeer-dejinta.**

1) Golaha Degaanka ee Degmadu waxa uu awood u leeyahay in uu dejiyo xeer-hoosaadyo (bye laws) aan ka hor imanayn Dastuurka, Xeerarka ay ansixiyaan Golayaasha Xeerdejintu (Baarlamaanka) Madaxweynuhuna uu saxeexay dhaqangalkooda si loo faafiyo.
2) Xeer-hoosaadada ay soo saaraan golayaasha degmooyinku waa in loo gudbiyaa garyaqaanka guud iyada oo loo sii marinayo wasaarada arrimaha gudaha si uu u hubiyo in xeerka goluhu aanu ka hor imanayn dastuurka iyo xeerarka kale ee ay dejiyaan golaha baarlamaanku ka hor inta aanu saxeexin gudoomiyaha degmadu.
3) Haddii ay Wasaaraddu kaddib marka ay hesho talada garyaqaanka guud, ogaato in Xeer-hoosaadka goluhu khilaafayo dastuurka ama xeerarka dhaqangalka ah, raacinaysa talo bixintii garyaqaanka.
4) Xeerarka ay soo saaraan golayaasha degmooyinku ee uu saxeexo gudoomiyaha degmadu waa in lagu soo saaraa faafinta rasmiga ah Lana faafiyaa.

**CUTUBKA 7AAD**
**DOORASHOOYINKA GUDOOMIYAHA DEGMADA**
**AHNA DUQA D/HOOSE IYO KUXIGEENKIISA**

**Qodobka 66aad**
**Dhaarta Mudanayaasha Golaha**

1. Laga bilaabo maalinta ku dhawaaqida maxkamdda gobolka natiijada kama danbaysta ah ee doorashada mudanayaasha cusub, wasiirka wasaaradda Arrimaha Guduhu wuxuu ku dhawaaqayaa maalinta fadhiyada golayaasha deegaanada ee demooyinka dalka ay qabsoomayso, isagoo ka baahinaya warbaahinta, (15) cisho gudohood.
2. Haddii wasiirku ku dhawaaqi waayo, gole waliba isaga ayaa iskii u kulmaya (10)

cisho gudahood oo ka danbaysa (15) cisho ee hore.
3. Kulankaa ugu horeeyay, waxaa gudoominaya isla markaasna dhaarinaya Gudoomiyaha maxkamadda Gobolka ama garsoore uu u igmaday oo ka tirsan kuwa gobolka iyo kuwa degmooyinka gobolkaas ka tirsan.
4. Fadhigaas lagu dhaarinayo mudanayaasha waxaa gudoonka shirka lagu wareejinayaa mudanaha ugu da‟da weyn, waxaana lagu dooranayaa Gudoomiyaha Degmada ahna Duqa iyo ku xigeenkiisa, iyadoo ay goobjoog ka yihiin garsoorayaashii dhaariyey iyo guddoomiyaha gobolka ama ciddii uu u igmado.
5. Habka dhaaruntana waxay noqoaysaa sida ku cad qodobka 129aad ee dastuurka.

## Qodobka 67aad
## Habka Doorashada Guddoomiyaha Ahna Duqa Iyo Ku Xigeenkiisa

1. Duqa Degmada iyo Ku-Xigeenkiisa Doorashadoodu waa kali kali, lamaane maaha.
2. Marka la magaacabo ama uu isu sharaxo hal musharax in loo doorto Duqa ama ku Xigeenkiisa, wuxuu shir gudoonka fadhigu ku dhawaaqayaa codayntii **Ka dib wuxuu ku dhawaaqayaa Natiijada Codaynta.**
3. Marka laba musharax ama ka badan la soo jeediyo ama ay isu taagaan in loo doorto Duqa ama ku Xigeenkiisa, habka Doorashadu waxay noqonaysaa Gacan taag, oo ku ansaxaysa cod hal (1) dheeri ah.

## Qodobka 68aad
## Muddada Duqa Iyo Ku-Xigeenkiisa

1. Duqa iyo Ku-Xigeenkiisa muddada loo doortay Xilka way haynayaan, hadii aanay iska casilin ama aan laga qaadin ama aanay ku sifoobin tilmaamaha lagu waayi karo xubinimada Golaha ee ku xusan Q. 29aad iyo Qodobka 70aad ee xeerkan.
2. Duqa iyo Ku-Xigeenkiisa Degmooyinku way is casili karaan, istiqaaladooda oo sababaysana waxay u soo gudbinayaan Golaha Deegaanka oo leh awooda aqbalaada ama diidmada
3. Haddii istiqaaladda laga aqbalo, Doorashada Duqa iyo Ku-xigeenkiisa cusub ama midkoodba isla fadhigaas ayaa lagu dooranayaa, iyadoo la raacayo nidaamkii hore loogu soo doortay Ee ku xusan Qodobka 67aad Ee Xeerkan.

## Qodobka 69aad
## Gudbinta Waxqabadka Duqa Iyo Ku-Xigeenkiisa.

1. Gudiga fulinta marka Sannad u dhammaadaba, waxaa waajib ku ah inay warbixin buuxda oo waxqabad, Qoraal ahaan muddo (30) cisho Gudahood ah Golaha ugu soo gudibiyaan.
2. Xubnaha Goluhu waxay xaq u leeyihiin inay su'aalo ka weydiiyaan warbixinta.

## Qodobka 70aad
## Xil Ka Qaadista Duqa Iyo Ku-Xigeenkiisa.

1. Duqa Degmada iyo ku-Xigeenkiisa waxaa xilka lagaga qaadi karaa marka ay ku sifoobaan oo ay ku cadaadaan sababaha soo socda ee hoos ku qoran. Haduu: -
   a. Ka leexdo gudashada waajibaadka golaha Degmada iyo istraatiijiyadda guud ee Qaranka.

b. Jabiyo ama uu baal maro, Xeer Hoosaadyada Golaha iyo Xeerkan.
c. Ku sifoobo Awood maroorsi iyo kaligii talisnimo.
d. Caadaysto ku tumashada shuruucda, iyo Xeerarka Qaranka.
e. Ku kaco Kooxaysi, qabyaalad, kicin xamaasad oo horseedi kara Nabadgelyo darro.
f. Ku cadaato laguna helo musuqmaasuq iyo lunsi hanti qaran.
g. Haddii uu qaban waayo duqu kalfadhiyada ama shirarka Golaha uu waajibiyay xeerkan.

2. Xil ka qaadista Duqa ama ku-Xigeenkiisa ama labadooda oo wada jir ah waxaa soo jeedin kara Saddex meelood meel (1/3) xubnaha Golaha Deegaanka, iyaga oo qoraal sababaysan u soo gudbinaaya Duqa oo ku qaban doona shir aan caadi ahayn muddo (3) cisho gudahood ah oo ka bilaabanta maallinta uu soo gaadhay qoraalku waxaana nuqulo la siinayaa Gudoomiyaha Gobolka iyo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
3. Haddii uu Duqu uu ku fulin waayo qabashada shirkaas aan caadiga ahayn muddada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkan, waxaa xilkii qabashada shirkaas fulinaya Guddoomiyaha Gobolka oo muddo 5 cisho gudahood ah ku qaban doona shirka taas oo ka bilaabmaysa dhamaadka 3dii cisho ee hore.
4. Duqa ka baaqsaday fulinta qabshadii shirkana wuxuu mutaysanayaa ciqaab gaadhi karta waayitaanka xubinimada sida ku xusan Qodobka 30aad ee xeerkan.
5. Xil ka qaadista Duqa iyo Ku-Xigeenkiisa waxay ku ansaxaysaa kala badh iyo hal (absolute Majority) tirada Guud ee xubnaha Golaha
6. Marka Duqa iyo Ku-Xigeenkiisa laga qaadayo xilka iyada oo la raacaayo qodobkan faqradihiisa (1aad iyo 2aad), waxaa shirkaa guddoominaya xubinta ugu da'dawayn, mudanayaasha jooga shirkaa gaarka ah waxay sii wadanayaan, una si gudbayaan Doorashada Duqa iyo ku-xigeenkiisa, ee buuxinaya jagooyinka bannaanaaday, iyada oo la raacayo Qodobka 68aad ee Xeerkan waxaana Shirkaa Guddoominaya xubinta ugu da'da wayn Golaha.
7. Marka ay Xilka Ka Qaadistu khusayso duqa oo kali ah, waxaa shirkaa gudoominaya kuxigeenka duqa. kadibna waxaa loo gudbayaa doorashada duqa iyada oo la raacayo qodobka 68aad ee xeerkan.
8. Soo jeedinta Codsiga Xil ka qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa waxa shardi ah inay sababaysantahay ayna waafaqsantahay shurrudaha ku xusan qodobkan faqradiisa 1aad, ee Xeerkan.
9. Haddii laysku qabto sifaha sharci ee xilka qaadista Duqa iyo ku xigeenkiisa waxa xalinta murankaas u xilsaaran go‟aana ka gaadhi kara iyaggoo u eegaya sifaha sharci ee xeerkan guddida joogtada ee golaha deegaankaas, haddii ay ku guuldaraystaan ama ay ku dhamaan waydo waxaa loo gudbinayaa Wudaha.

## CUTUBKA 8AAD
## QAAB DHISMEEDKA MAAMULKA DAWLADAHA HOOSE EE DEGMOOYINKA IYO XILALKOODA.

### Qodobka 71aad
### Maamulka Dawladda Hoose ee Degmada.

1) Qaab-dhismeedka dawladaha hoose ee degmooyinka darajada (A) (B) iyo (C) waxa ay yeelanayaan waaxaha lagama maarmaanka u ah hawl-gudashadooda, kuwaasi oo ay ka maid yihiin;

a) Waaxda Maamulka & Maaliyadda.

b) Waaxda Hawlaha Guud iyo dhulka.
c) Waaxda Cashuuraha.
d) Waaxda Arrimaha Bulshada.
e) Waaxda Qorshaynta.
f) Waaxaha kale ee golaha degaanku u arko lagama maarmaan.

2) Waax kasta oo ku xusan farqada1aad waxay usii kala baxaysaa qaybo "**Head Units**" iyo aamo hoos yimaadda qayb kasta ee Waaxyahu ka kooban yihiin.

3) Qaybaha waax kastaa ka kooban tahay iyo laamaha ka farcama qaybaha waa in lagu caddeeyo qaab dhismeedka D/Hoose ee Degmada "**Structure**" ee ay dejiyeen gudidda fulintu ansixiyaana golayaasha deegaanku.

4) Waaxyaha Dawladda Hoose ee Degmada waa la kordhinkaraa, waana la yarayn karaa, waana la isku dari karaa hadba baahidoodu siday tahay.

5) Degmooyinka Darajada "D" waxay yeelanayaan laba qaybood "Head of Service" oo kala ah:

a) Qaybta Maamulka iyo Cashuuraadka.
b) Qaybta Dhulka iyo Adeegyada Arrimaha Bulshada. Degmooyinku waxay ku salaysnaan doontaa qiimayn Wasaaradda Arrimaha Guduhu ku samayso Kobaca Dhaqaalaha iyo korodhka Dakhliga hadba Heerka Degmo kastaa ka gaadho.

7) Degmo kastaa waxay yeelanaysaa Hantidhowrka Gudaha, waxana soo magacaabaya Gudida Fulinta waxana ansixinaya golaha degaanka

8) Doorka iyo waajibaadyada shaqo ee hanta-dhawraha gudaha degmadu waa:

a) In uu sameeyo dibu eegid joogto ah si uu u xaqiijiyo in degmadu lacagta u isticmaashay si sharciga iyo qorshaha degmada waafaqsan.
b) Inuu si joogta ah uga war hayo in la raacay shuruucdii maaaliyada iyo inuu si joogta ah u hubiyo u hogaansanaanta sharciga iyo xeerarka Dawladaha hoose
c) Inuu baadhitaan ku sameeyo xisaab xidhada degmada oo ku saabsan in xisaab xidhada degmadu ay yihiin qaar la xidhiidha xisaabta degmada, sax ah, dhamaystiran si fiicana loo diyaariyey.
d) In uu sameeyo baadhitaan khaas ah marka loogu yeedho meel baadhitaan u baahan.
e) In uu soo saaro warbixinta hantidhowrka ee sadex-biloodlaha ah, iyo sanadle ah, una gudbiyo gudida fulinta ee Golaha Degaanka Degmada, Nuqulada warbixinta waxa la kala siinaya Wasiirka Arrimaha Gudaha, Hantidhowraha Guud iyo Xisaabiyaha Guud.

## Qodobka 72aad
## Waaxyaha Degmooyinka Darajada "A"

**A. XILKA WAAXDA MAAMULKA & MAALIYADDA**

1. Hubinta, Diyaarinta, kaydinta iyo ku shaqaynta Miisaaniyadda dawladda Hoose ee Degmada.
2. Diyaarinta, Xafidaadda, iyo kaydinta dhokumentiga Xisaabxidhyada la xidhiidha maamulka Xisaabaadka iyo Miisaaniyadda.
3. Maamulka iyo ilaalinta hantida iyo Qalabka Bakhaaradda iyo Xafiisyada.
4. Kaydinta iyo la socodka dhokumentiga la xidhiidha qandaraasyada ay dhinac ka tahay Dawladda Hoose ee Degmada.
5. Diiwaangelinta hantida guurtada iyo tan ma guurtada ah ee Dawladda Hoose ee Degmada.
6. Dalabka Daabacaada, kaydinta iyo qaybinta Buugaagta lacag qabashada iyo

Cashuuraadka, Shidaalka iyo Bakhaarada.
7. Is barbar dhigga qorshaha Dakhliga iyo kharashka bil walba.
8. Diyaarinta Xisaab-xidhyada, bileed, Saddex bilood, Lix Bilood iyo Sannadkii.
9. Soo iibinta Alaabta, diiwaangelintooda iyo kaydintood.
10. Hubinta soo xeraynta Dakhli maalmeedka, bileedka iyo kan Sannadka.
11. Hubinta soo xeraynta Buugaagta iyo tigidhada la isticmaalay iyo kaydintooda.

**B. XILKA WAAXDA CASHUURAHA.**
1. Ururinta Cashuuraha Dawladda Hoose ee Degmada.
2. Abuuris ilo dhaqaale oo cusub iyo u sahamintooda.
3. Dabagalka iyo soo xaraynta Cashuurihii baaqday sannooyinkii hore.
4. Kormeerka suuqyada iyo hawl qabadka shaqaalaha ururiya Cashuuraadka. tababaridaa goob shaqo (on the job training).
6. Tira-koobidda iyo diiwaangelinta hantida ma guurtada ah ee dadewynaha Degmada ku nooli leeyihiin, sida Daaraha, Carshaanta, Sandaqadaha, Beeraha, Gawaadhida I.W.M. ee Cashuuruhu ku waajibtay.
7. Ka talo bixinta Arrimaha shaqada iyo shaqaalaha Waaxda.
8. Qiimaynta noocyada Cashuuraha ee Sannad kasta.
9. Ururinta kirada iyo Arrimaha ijaarka Hantida Dawladda Hoose.
10. Tirakoobka iyo Diiwaangelinta ilaha Dakhliga.
11. Soo xeraynta Dakhli maalmeedka
12. Talo soo jeedinta abuuridda iyo dib u habaynta Cashuuraha.
13. Kala xadaynta iyo kala habeynta Darajooyinka Liisamadooda.

**C. <u>XILKA WAAXDA HAWLAHA GUUD & DHULKA</u>**
1. Hirgelinta mashaariicda iyo dhismayaasha.
2. Dayactirka Dhismayaasha D/Hoose ee Degmada.
3. Hawlgelinta iyo dayactirka Gaadiidka, Guryaha, Xafiisyada, iyo qalabka Dawladda Hoose.
4. Soo gudbinta baahidda Gaadiid Cusub. Dayactirka iyo xanaanaynta jidadka, Beeraha Nasashada, garoomada iyo fagaarayaasha Caanka ah.
5. Soo diyaarinta qorshe maalmeedka, shidaalka, Saliidaha iyo xaydhaha Gaadiidka, matoorada iyo qalabka culusi u baahan yihiin.
6. Maamulka Hoosooyinka, Geerashyada iyo qalabayntooda
7. Ku dhaqanka qorshaha iyo jaangoynta Dhulka, iyadoo la raacayo naqshada Guud (Master Plan) ee magaalada.
8. Ku dhaqanka shuruucda iyo Xeerarka maamulka Dhulka.
9. Diiwaangelinta oggolaanshaha lahaanshaha Dhulka, mulkiyadaha, dhismayaasha ma guurtada ah ee dadweynaha, arrimaha Dhul bixinta iyo kormeerka Dhulka.
10. Ilaalinta iyo daryeelka dhulka danta guud ee ku jira naqshadda guud, iyadoo la raacayo xeerka maamulka dhulka magaalooyinka.
11. Jaangoynta iyo Gacan ku haynta dayactirka dhismayaasha Golaha Degmada, Xannaanaynta jidadka, goobaha nasashada, garoomada, Dugsiyada, rugaha Caafimaadka, Rugaha kawaanada (iyo Istaamada Gaadiidka) I.W.M.
12. Ka talo bixinta khilaafaadka ka yimaada jagooyinka dhulka magaalooyinka farsamo ahaan.
13. Qorshaynta iyo isku dheelitirka Basaska, Tagaasidda, Iskarogooyinka iyo Gaadiidka xammuulka dadweynaha saldhigyadooda, Gaadhi Dameerada iyo Dadka maritaankooda iyo Calaamadaha la xidhiidha.

14. Samaynta iyo diyaarinta calaamadaha la xidhiidha Nabadgelyadda wadooyinka iyo muujintooda.
15. Habaynta iyo dejinta Calaamadaha Ganacsiga iyo xayaysiinta (Commercial Sign Boards).
16. Samaynta, diyaarinta iyo rakibaadda tiirarka laydhka waddooyinka, Aarkooyinka, xarumaha nasashada, goobaha Dabaaldegyada iyo munaasibadaha.
17. Hubinta, Farsamadda, badbaadada qalabka korontoda, Telfoonada, shidaalka iyo ka hortagga khatarta dabka.
18. Habaynta iyo kala duwida bulaacadaha, biyo mareenada, dhuumaha Biyaha, saaqiyadaha iyo adeegyada mara dhulka hoostiisa iyo oogadiisaba.
19. Keydinta Mulkiyadaha iyo Dhokomantiga la xiriira Dhul bixinta iyo Diiwaangalintooda.
20. Hubinta, iswaafajinta Naqshada iyo Qaabka Dhul bixinta.
21. Sameynta iyo Hubinta Jidadka, Wadooyinka, Sakadaha, iyo Lambarintooda.
22. Tirakoobka, Diiwaangalinta iyo lambarinta dhismayaasha Dadweynaha iyo Dawladda.
23. Astaynta iyo Tilmaamidda Goobaha Danta Guud ee ku jirta naqshadda guud
24. Dib u habeynta Naqshadaha Dhismaha iyo jaangoynta Cabirka Dhulka ayadoo loo kala saaraayo raqamadda kala ah A, B, C iyo D si Qof waliba itaalkiisa u dhisto.
25. Dejinta iyo Sameynta Qorshaha horumarinta ee Degmada.
26. Dab Demiska, Qurxinta iyo Bilicsamida Magaalada.

**D. XILKA WAAXDA ARRIMAHA BULSHADA.**

1. Ilaalinta Nadaafadda, Fayo dhawrka, bilicsanaanta iyo quruxda Degmada
2. Horumarinta Deegaanka iyo khayraadka dabiiciga ah ee Degmada.
3. Horumarinta fanka, isboortiga, suugaanta, Hiddaha iyo Dhaqanka
4. Noolaynta shacaa'iirta islaamiga ah, waddaniga iyo Caalamiga ah.
5. Daryeelka faya-dhawrka Guud iyo ka hortagga cuduradda faafa.
6. Daad-guraynta iyo u gargaarka dadweynaha haddii aafo dhacdo iyo u gargaarkooda.
7. Dhisidda iyo dayactirka Dugsiyada aasaasiga ah, kuwa quraanka iyo daryeelka Masaajidyada.
8. Daryeelka iyo dhismaha xarumaha Xanaanada Hooyada iyo Dhalaanka iyo Dugsiyada dhaqaalaha guriga (Hoyga).
9. Habaynta, Qorshaynta, Hubinta iyo isku dheeli tirka baahida Goobaha Biyaha "Kiosks" iyo waxqabadkooda.
10. Maamulidda iyo kormeerka la xidhiidha horumarinta miyiga.
11. Habaynta hawlaha aasidda iyo Qabuuraha.
12 Qorshaha kaltanka Rugaha Caafimaadka iyo Farmasiyayaasha Iyo heegan galintooda.
13. La socodka isticmaalka dhaqan-galka daawooyinka iyo Cuntada Qasaacadaysan iyo la socodka mudada isticmaalka.
14. Casriyeynta Suuqyada dalagyada wadaniga ah iyo dhiirigalinta cunidooda
15. Ilaalinta anshaxa, wacyi galinta iyo taakulaynta dadka tabaalaysan.
16. Sicir Goynta qiimaha Badeecadaha iyo ilaalinta maceeshada quutal daruuriga.
17. Ilaalinta Anshaxa, wakhtiga goobaha lagu daawado fiidiyoyaasha, Silimada iyo Xafladaha Aroosyada.
18. Diiwaangelinta iyo tiro koobka Dadweynaha iyadda oo loo raacayo igmasho laga helo iyo xeer nidaamiye ay diyaariso wasaaradda arrimaha guduhu si laysu waafajiyo qodobka hadlaya arrintaas iyo xilka wasaaradda ee ku cad xeerka jinsiyadda.

**E. XILKA WAAXDA QORSHAYNTA**

1) Inay taageero ka siiso Golayaasha Degaanka tilmaamitaanka baahiyaha iyo higsiyada bulshooyinka ku nool magaalada iyo miyiga.
2) Inay taageero ka siiso Golayaasha Degaanka kala mudnaansiinta baahiyaha degmada iyada oo lagu salaynayo ka qaybgal.
3) Inay Kor u qaaddo wada shaqaynta iyo inay bahwadaag la noqoto bulshooyinka, rayidka ah, ganacsiga gaarka ah, hay'adaha dawliga ah ee ku lugta leh maalgelinta iyo hawlaha horumarinta.
4) Inay Samayso sahamin xaaladda, ururiso xogo bilow ah oo la xiriira dhinacyada dhaqaalaha iyo bulshada. duwan iyo hay'adaha si loogu adeegsado qorshaynta horumarinta, dabogalka iyo qiimaynta.
6) Inay samayso, ayna hayso ama ilaaliso xog ururimaha muhiimka ah iyo nidaamyada maamulka.
7) Inay isku dubariddo samaynta iyo cusboonaysiinta Qorshaha horumarinta degmada.
8) Inay taagerto samaynta qorshe sannadeedka degmada iyo inay isku xidho kobcinta maalgelinta ama dejinta qorshe hawleed iyo miisaaniyada.
9) Inay dabagasho, ka warbixiso fulinta maalgelinta ama qaybta horumarinta ee Qorshe Hawleedka Sannadlaha ah iyo Miisaaniyadda, iyo guud ahaan ba horumarka laga samaynayo mudnaanaha Qorshaha horumarinta degmada.
10) Inay diyaariso qaababka iyo nidaamyada ee Meertada Maamulka Mashaariicda (sida qeexidda mashruuca, qorshaynta, fulinta, dabogalka iyo qiimaynta maalgelimaha ama mashruucyada horumarinta) iyo kor u qaadidda fulintooda ee waaxyaha oo dhan.
11) Inay raadiso fursado bahwadaagnimo lagula yeelanayo ganacsiga gaarka ah, hay'adaha caalamiga ah, kuwa Qaramada Midoobay, Ngo'yada iyo Deeq bixiyayaasha.
12) Inay hubiso in arrimaha jinsiga (lab/dhadig), ka hortaga iyo khafiifinta iskudhacyada lagu dhexdaro siyaasadaha iyo qorshayaasha degmada.

## Qodobka 73aad
## Shaqaalaha Dawlaha Hoose Ee Degmooyinka

1) Shaqaalaha joogtada ah dawladaha hoose ee degmooyinka dalku waxay ka mid yihiin shaqaalaha dawlada, waxana loo raacayaa nidaamka shaqaalaynta sharciga shaqaalaha dawlada waxana dawladda.
2) Xilalka jagooyinka shaqaalaha dawladaha hoose waxa loo qaybinayaa qaybaha A, B, C, & D.
3) Shaqaalaha Jagooyinka "A" iyo "B" ee dawladaha hoose waxa lagu magacaabi karaa derejada bilowga ah ee qaybta derejadani tahay iyadoo lagu salaynayo tartan imtixaan furan iyo haysashada shahaadooyin asal ah iyagoo mari doona xilliga tijaabada shaqo,
4) Shaqaalaha Jagooyinka "A" iyo "B" ee ku xusan farqada 2aad ee qodobkan, shaqaalayntooda, dallacaadooda, casilaadooda iyo erigooda waxa awood u leh Guddiga Hay'adda Shaqaalaha Dawladda kadib marka ay ka soo codsadaan Guddiga Fulinta ee Degmadu halkaas oo hay'adda shaqaalaha dawladdu ku soo xuli doonto tartan furan oo xor iyo xirfad ku dhisan.
5) Shaqaalaha Jagooyinka "C" iyo "D" ee dawladaha hoose shaqaalayntoodu waxay noqonaysaa qiimayn, qoritaankooda, magacaabistooda, dallacaadooda, casilaadooda iyo erigooda waxa awood u yeelanaya guddiga fulinta ee degmada kuwaas oo u soo gudbinaya hay'adda shaqaalaha dawladda.
6) Xaddiga Mushaharooyinka ee shaqaalaha dawladdaha hoose waa in ay kala

sinnaadaan shaqaalaha kale ee dawladda.
7) Gunnooyinka shaqaalaha iyo jagadii Gunno Xil mudan waxa soo jeedinaya Gudida fulinta waxaana ansixinaya Golaha Deegaanka Degmada.

## Qodobka 74aad
## Dhismaha Mashaariicda.

1. Mashaariicda horumarinta dhaqaalaha iyo adeegyada Arrimaha Bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, beeraha, xoolaha, biyaha, wadooyinka, saldhigyada, sayladaha iwm ee laga maalgalinayo miisaaniyada degmada, waa in ay golayaasha degaanka ee degmooyinku si isu dheeli tiran oo ku salaysan baahidda looga fuliyo degsiimooyinka iyo qaybaha ay ka kooban tahay degmadu.
2. Mashaariicda horumarinta dhaqaalaha iyo adeegyada Arrimaha Bulshada ee ay hirgalinayaan dawlada dhexe, ama ay maalgalinayaan hay'adaha Qaramada Midoobay iyo Hay'adaha kale ee Caalamiga ah waa in ay waafaqsan yihiin Goobaha laga dhisayaa qorshaha iyo jaangoynta degmooyinka.
3. Dawladda Hoose ee Degmadu waxay awood u leedahay inay joojiso ama diido mashruuc kasta oo aan marka hore lagala tashan oo aan oggolaansho haysan isticmaalka dhulka ama dhismaha aan waafaqsanayn qorshaha iyo jaangoynta Dawldda Hoose ee degmada.
4. Dhismaha mashaariicda adeegyada bulshada waxaa laga dhisi karaa Degsiimooyinka iyo Goobta ay isla waafaqaan Golaha Degmadda iyo Hay'adaha ay khusayso.
5. Golaha Deegaanku mashaariicda horumarineed ee Degmada waxay uga baahan yihiin Hay'ada caalamiga ah waxay u soo gudbinayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo u sii gudbin doonta Wasaaradda Qorshaynta Qaranka iyo wasaaradaha ay khusayso.

# CUTUBKA 9AAD
# ARRIMAHA FARSAMADA IYO ADEEGYADA BULSHADA

## Qodobka 75aad
## Heshiisyada Farsamada.

Hay'adaha Dawliga ah ee adeegga Bulshada, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo hay'adaha iyo shirkadaha caalamiga ah waxaa shardi ah inay heshiis qoraal ah kala galaan Degmada arrimaha farsamada ee Qodobkan 1, 2,3,4,5,6,7,8, ee hoos ku qeexan: -

**1. CURIN DHISMO AMA HAWL SHAQO**.

Lama bilaabi karo hawlgal shaqo curin dhisme cusub, dib-u- habayn mid duuga haddii aan Dawladda Hoose laga haysan oggolaanshaha ku dhaqanka dhulka iyo dhisme curin "Building Permit"

**2. SOO GUDBINTA NAQSHADAHA "MAP OF THE AREA".**

a) Ruqsadda ogoolaanshaha xukuumadda ka sakow wakaaladaha Nalka iyo shirkadaaha Telefoonada, waxaa ku waajib ah markasta inay Naqshadahooda qorshaha fidinta iyo ballaadhinta farsamadda Nalka iyo Telefoonada u soo gudbiyaan Dawladda Hoose ee Degmada si loo waafajiyo ama loogu talo galo jaangoynta Degmada, loona siiyo oggolaanshaha ku dhaqanka.

b) Naqshadda laga rabo shirkadaha Nalka iyo Telefoonada waa inay ku cad yihiin arrimahan.

1. Aagga iyo xaafadda ay hawlgalka u rabaan.
2. Tirada iyo magacyada jidadka iyo toobiyaha xaafad kasta u qoondaysan inay

gaadhsiiyaan Nalka ama tilifoonada.
3.Tiirarka Nalka/Tilifoonada dhumucdooda balaadhka iyo dhererkoodaba.
4. Qalabka ay ka samaysan yihiin, (Shub, Bir, Loox, I.W.M)
5. Cabirka ay isku jirayaan tiirarku (mitir)
6. Cabirka (Mitir) tiirarku ay aasan yihiin iyo inta ay dhulka ka sareeyaan.
7. Waayiradda Nalka iyo xadhkaha tilifoonada in ay yihiin kuwa dhulka hoostiisa ku aasan ama hawada sare maraya (Under Ground or over head line Cables).
8. Goobaha la dhigayo haddii ay jiraan (Transmeters or transformer and main cable distribution Stations)
9. Nooca waayirada iyo xadhkaha dhumucdooda iyo inay duuban yihiin ama qaawan yihiin.
10. Cabirka dhulka ee qalabka la dhigaayo (Transformers)
11. Cabirka tiirarka Nalka ama tilifoonadu u jiraan daaraha, dhismayaasha hortooda iyo intay jidadka u jiraan.
12. Shirkadaha Tilifoonada iyo kuwa Laydhka in mid kasta tiirarkeedu u gaar yihiiin wax wadaag la yidhaahdaana aanu ka dhaxayn

**3. WAKAALADA BIYAHA DEGMADA**

c) Wakaaladaha biyaha ee Degmooyinka waxa laga rabaa inay joogtaynta biyo gelinta oo naqshadaysan u gudbiyaan maamulka Degmadda, wasaarada arrimaha gudaha iyo wasaarada hawlaha guud si loo waafajiyo fidinta iyo Naqshada Degmadda waxaana laga rabaa macluumaadkan: -

1. Xaafadda biyo galinta lala rabo
2. Jidadka iyo toobiyaha biyo galinta,
3. Cabirka iyo muga dhismaha biyo kaydiyaha (Water Reservior)
4. Dhuumaha iyo qasabadaha Kiyooska "Main Pipes"dhumucdooda
5. Qasabadaha biyo qaybinta dhumucdooda "Distrbution pipe line"
6. Cabirka dhismaha gododka biyo qaybinta "Main Valves"
7. Cabirka dhulka hoostiisa ee qasabaduhu ku duugan yihiin ama ku aasan yihiin.
8. Nooca saacadaha biyo tiriska
9. Goobaha waraabka dadweynaha "Kiosks" tiradooda

**4. SHIRKADAHA LAYDHKA. & ISGAADHSIINTA GAARKA LOO LEEYAHAY.**

a) Shirkadaha laydhka iyo isgaadhsiinta gaarka loo leeyahay way ka reeban yihiin in la siiyo ruqsadda oggolaanshaha ku dhaqanka dhulka haddii aanay la iman ruqsadda hay'adaha xukuumada ee hawshoodu khusayso
b) Kuma jiraan matoorada yaryar ee sida gaarka ah loo leeyahay ee lagu isticmaalo guri ama xafiis I.W.M. (Personal use)

**5. GOOB SHAQO.**

a) Hawlaha goob shaqo sida dib u dhis, dayac tir, dib-u- habayn ama hawlgal cusub oo la xidhiidha, Nalka, Tilifoonada, Biyo gelinta iyo wadooyinka ee kala ah godod qodis, dhul jeexid, ama furfurid qalab koronto, iyo tilifoon waxaa laga rabaa in ay marka hore ka soo qaataan Dawladda Hoose Ruqsadda oggolaanshaha goob shaqo.
b) Inay dhaqan galiso lana timaado hay'addu shuruudaha iyo astaamaha goob shaqo, kana mid yihiin.

1. Inay goob joog yihiin saraakiil ka kala tirsan Wasaaradda Hawlaha Guud, Wasaaradda Boosaha, Iyo Dawladda Hoose "Inspectors" aqoon u leh hawsha. Saraakiishaas waxa xil ka saaran yahay xogogaal u noqoshada qalabka hubinta iyo is waafajinta joogtaynta iyo naqshadaha ilaa dhammaadka hawsha
2. In goobta laga taago astaanta goob–shaqo ka socoto iyo eeriyada (iska jir ka digtoonow I.W.M.)

3. In goobta shaqo la xidho laguna wareejiyo dayr “Tiirar” (Udubyo) taagtaagan oo maryo cas laga lulo.
4. Haddii hawshu gaadho xilli habeenimo ah in Nal iftiimaya lagu xidho, haddii ay bohol ama godod la jeexay jiraan waardiye dadka uga diga la dhigo goobta.
5. In degdeg loo awdo ama loo dhiso gododka iyo dhulka jeexan isla markay hawshu dhamaato oo laga faraxasho.
6. In wixii qalab ah iyo hadhaa qashin ah degdeg looga raro goobtaas lana nadiifiyo.

c) Haddii fulin la’aanta shuuradaha ku qoran faqradda (1) aad ee Qodobkan awgeed dad wax ku noqdaan goobtaas shaqo ha noqoto dhimasho ama dhaawacba ama khasaare Gaadiid midkood waxa loo raacayaa magdhawga oo ka mas’uul ah hay’adda, shirkadda iyo cidda ay khusayso hawsha goobtaasi.

d) Maamulka Degmada haddii uu ka fulinayo goob ama aagag ay ku aasan yihiin ama ka taagan yihiin qalab farsamo ee Biyaha, laydhka iyo Tilifoonada kama fulin karaan karto hawl ilaa ay kala xidhiidho Hay’adaha ay khusayso.

e) Haddii ay dhacdo inay la tashi la’aan iyo wargelin la’aan hawl ka fuliyaan Goobahaas wixii khasaare gaadha qalabkaas waxaa ka mas’uul ah Maamulka Hay’adda ama Shirkadda.

**6. SHIRKADAHA HADDA JIRA.**

a) Shirkadaha gaarka loo leeyahay ee ku shaqada leh Nalka iyo Tililfoonada waa inay naqsahadahooda hadda jira *“**Map of the Area**”* u soo gudbiyaan Dawladda Hoose ee Degmada soona raaciyaan tirakoob waafi ah ee la xidhiidha qalabkooda dhismayaashooda iyo Guryaha ay ku jiraan laydhka iyo Tilifoonada.

b) Sannad kasta dhammaadkiisa shirkadaha Tilifoonada iyo laydhka waxa laga rabaa soo gudbinta korodhka Tilifoonada iyo laydhka ku soo biiray.

**7. KAALMAHA SHIDAALKA.**

a) Kaalmaha shidaalka kuma haboona oo way ka reeban tahay: -
1. In laga dhiso Xaafadaha la deggan yahay dhexdooda iyo Guryaha lagu nool yahay dhinacyadooda.
2. In laga dhiso Faras magaalaha Ganacsiga iyo suuqyada cidhiidhiga ee cagtu ku badan tahay ee jidadka dhexmaraa yahay 30 mitir ama wax ka yar.
3. In laga dhiso kaalmaha Shidaalka hareeraha Jidadka laamiga ah iyo jidadka caadiga ah masaafad 10 mitir wax ka yar.
4. Kaalmaha shidaalka ee foostooyinka kaydka u yihiin waa khatar iyo halis badheedha, ku ganacsigooduna sharciyan waa xaaraan lamana oggola.

b) Rugaha ka ganacsiga shidaalka waxa waajib ku ah inay u dhan yihiin kuna rakiban yihiin qalabka lagu bakhtiiyo ama lagula dagaalamo dabka (Safety Engineering and Work Shop Precautions).
1. Barkad Biyo ah oo kayd ah.
2. Ciid ku jirta weel diyaar ah lana dhigo ceelasha agtooda.
3. Haamo gacmeedka dabdamiska (Fire extinguishers ba)
4. Majarafado iyo baaldiyo.
5. Calaamadaha sigaar laguma cabi karo iyo calaamadaha khatarta “Madax Aadamiga ee lafaha ah ee isku talaabta “Shanshooyin ku suntan tahay”
6. In baabuurka matoorkiisu densanaado marka badroolka lagu shubayo.

**8. KA HORTEGGA KHATARTA DABKA.**

a) Dabka ka dhasha kaalmaha shidaalka iyo xadhkaha laydhka sababo la xidhiidha taxadir la’aan ama cillad farsamo iyo dayactir la’aan waxaa loo raacayaa oo ka mas’uul ah bixinta magdhawga dhibaatada iyo khasaaraha ay u gaystaan dad iyo duunyo cidda ay khusayso ee leh kaalinta ama korontada.

b) Shilalka gaadiidka dadweynuhu sababaan magdhaw laguma leh shirkadaha laydhka haddii qalabkoodu waafaqsan yihiin shuruudahan: -

1. Tiirarka laydhka oo shub ah, qori ama bir
2. Xadhkaha laydhka oo dhulka ka sareeya ugu yaraan (8) mitir, hoostana ugu yaraan 1 mitir qodan
3. Xadhkaha laydhka oo duuban.

**9. WAX SOO SAARKA WAKAALADAHA.**

1. Wakaaladaha iyo shirkadaha ku hawlahan laydhka, Biyaha, Tilfoonada iyo Warshadaha waxa laga rabaa Cashuurta Dawladda Hoose ee ku waajibtay: -
   a) Wax soo saarkooda.
   b) Cashuurta Dhulka ee Dhismayaasha iyo Qalabkooda Farsamo (Areial Transmision or Disc Units) Transformers tiirarka.
2. Dawladda Hoose iyo Hay'adaha ay khusayso ee ay ku waajibtay cashuurta ku cad xarafka 1aad ee Qodobkan, Qaabka iyo nidaamka Xisaabaadka ay ku kala qaadanayaan Cashuurta Dawladda Hoose, waxaa isla meel dhigaaya labada dhinac ee ay khusayso.
3. Shardise waxaa ah in lagu saleeyo raad raaca nidaamkan hoos ku qoran midkood: -
   a) In loogu qaado biilasha ay ku soo dallacaan macaamiisha ee billaha ah.
   b) Meter Reading system saacadaha istimaalka qoraan.
   c) Dakhli bileedka Monthly income "Cash Buug Reference"
   d) Bank Statement "Dhinaca Dakhlliga".
   e) Diiwaanada macaamiisha iyo iibka "General Ledger & Sales Journal".
   f) Diiwaanka Dakhli maalmeedka xarunta ee Hay'ad kasta.
   g) Xisaab xidh billeedka ama sannadeedka.

## Qodobka 76aad
## Goobaha Qalabka Laydhka Iyo Tilfoonada.

1. Dawladda Hoose xil baa ka saaran qalabka korontada iyo tilfoonada ilaalintooda, waxaana ka reeban bixinta Goobaha ay ka taagan yihiin ama ku aasan yihiin qalabka korontada iyo Tilifoonada
2. Waxa kale oo ka reeban bixinta dhulka Naqshada ugu jira ee D/Hoose ku dhaqankiisa hore u bixisay.

## Qodobka 77aad
## Gaadiidka Dadweynaha.

1. Waxa waajib ku ah Golaha Deegaanka tirakoobka, dib u habaynta, Diiwn Gelinta iyo isu dheeli tirka Gaadiidka daweynaha "Basaska, Tagaasida" ee u kala goosha Degmada.
   a) In la diiwaan geliyo lana siiyo Baabuur kasta lambar ka diiwaan gashan Dawladda Hoose oo taxane ah, laguna qoro 2 dheeg.
   b) In diilin renji ah lagu sunto Tagaasida Degmada gudaheeda ka hawlgala korkiisana laga taago calaamadda (Taxi) iyo astaanta Degmada ee labada daaqadood dhinacyada hore
   c) In rugaha gaadiidka dadweynaha iyo adeega guud la kala saaro, si saxmadda loo yareeyo.
   d) In saldhigyada iyo barxadaha nasashada iyo marinada ay maraan la habeeyo, lagana taago astaamaha gaadiidka daweynaha.
   e) In aagga go'doonka ah ee gaadiid la'aanta iyo gaadiid xumo ka taagan tahay gaadiid ka howl gala loo sameeyo.

**Qodobka 78aad**
**Gawraca Iyo Sariibadaha.**

1. Hubinta iyo suggida Caafimaadka Xoolaha daabaxa ah ka sokow waxaaa Dawladda Hoose saran u fiijignaanta ka hortagga cudurada faafa ee ka dhashay nadaafad- darrada siiba goobaha gawraca, sariibadaha hilibka, Kaluunka iyo khudradaarta oo loo baahan yahay joogtaynta nadaafadooda.
2. In shaqaalaha ku hawlan dareyeelka iyo nadaafadda Goobtaas la daryeelo loona fidiyo gunnayn gaar u ah iyo nafaqayn.
3. In biyo kayd ah oo ku filan ay khasab tahay helitaankoodu.
4. Hawl maalmeedka Nadaafada goobahaas oo ah sidatan: -
   a) In biyo kulul lagu maydho goobta Gawraca, Sariibadaha Hilibka, khudaarta Kaluunka miisaska, iyo qalabka la isticmaalo.
   b) In Caustic Acid iyo soodhe “Powder” ah lagu maydho maalin kasta xilliga laga rawaxo oo joogto ah.
   c) In bulaacadaha iyo dhuumaha wasakh mareenka ah Canalization/Drainage ee xero dhiigta xilliyada qaarkood lagu shubo Sulphuric acid biyana la raacsiiyo ugu dambaynta.
5. Isticmaalka kiimikada lagu nadiifinayo kawaanada iyo sariibadaha waxa oggolaansho looga qaadanayaa Wasaaradda Caafimaadka. Fayadhowrka. Kor u qaadidda iyo ilaalinta fayadhawrka waxaa asaas u ah jaangoynta kormeerka iyo wax ka qabadka.
   a) Bulaacadaha, Musqulaha iyo Goobaha khashin qubka Buufintooda iyo Nadaafadooda
   b) Goobaha Ganacsiga sid sariibadaha, Huteelada Cuntada, Mukhaayadaha, Albeerkooyinka Hurdada qalabkooda iyo weelka Cuntada hubintooda Xaaladooda Nadaafadeed iyo amar bixinta baddalkooda haddii ay lama huraan noqoto.

**Qodobka 79aad**
**Fayadhowrka.**

Kor u qaadidda iyo ilaalinta fayadhawrka waxaa asaas u ah jaangoynta kormeerka iyo wax ka qabadka.
   a) Bulaacadaha, Musqulaha iyo Goobaha khashin qubka Buufintooda iyo Nadaafadooda
   b) Goobaha Ganacsiga sid sariibadaha, Huteelada Cuntada, Mukhaayadaha, Albeerkooyinka Hurdada qalabkooda iyo weelka Cuntada hubintooda Xaaladooda Nadaafadeed iyo amar bixinta baddalkooda haddii ay lama huraan noqoto.

**Qodobka 80aad**
**Dab Demiska.**

1. Mudnaanta kowaad ee maalgelineed waa in la siiyo helitaanka Baabuurta dabdemiska iyo qalabka fudud ee dabka lagula dagaalamo bakhtiintiisa.
2. Dawladda Hoose ee Degmada waxaa laga rabaa inay hanato maalgashiga iyo dedejinta dhismaha kooxda dab- demiska ee Degmada.
   a) Xarunta iyo Hoosada Gaadiidka Dab- demiska iyo Hoosada Hagaajinta Gaadiidka/Qalabka.
   b) Dugsiga tababarka shaqaalaha ee kooxda dabdamiska “Anti-Fire Gang/ Brigade”.

c) Berkadaha keydka biyaha dab-demiska dhismahooda.
d) Keenista qalabka fudud ee dab-deminta "Portable Fire Extinguishers".

3. Inay waajib kaga dhigaan meheradaha, Guryaha, Huteelada kuwa Cuntada iyo Hurdadaba inay dhigtaan qalabka dab-demiska laguna kormeero fulintooda.
4. Inay dhismayaasha Cusub waajib kaga dhigaan ku tala-galka qalabkaas nooc kastuu yahay.

**Qodobka 81aad**
**Astaamaha Wadooyinka.**

Dawladda Hoose ee Degmada waxa waajib ku ah, iyadoo adeegsanaysa Ciidanka Nabadgelyada Wadooyinka, inay qotomiso ama dejiso astaamaha waddooyinka (Traffic Signs) ee waddooyinka magaalooyinka gudahooda ee hoos yimaada masuuliyadda Goleyaasha Deegaanka ee degmooyinka.

**Qodobka 82aad**
**Qurxinta Iyo Dayactirka.**

1. Dawladda Hoose waxa ku waajib ah in ay dhisto Dhulka ku yaalla laamiga baalihiisa ee u dhexeeya dhismayaasha iyo jidka laamiga ah "Pavement".
2. Si kor loogu qaado bilicda iyo quruxda magaalada, waxaa ku waajib ah muwaadin kasta oo leh dhisme inuu dayactiro oo caddeeyo qurxinta dhismayaashiisa gaar ahaan faras magaalaha iyo suuqa ganacsiga Sannadiiba hal mar siiba maalmaha ciidaha.
3. Dawladda Hoose ee Degmada waxa ku waajib ah wacyi galinta iyo muddeynta dhismaha jidadka "Pavment" ee dadku maro iyo qurxinta dhismayaasha, meel marin la'aanta faraqadda 1aad, 2aad ee qodobkan waxaa lagu mutaysanayaa ganaax.
4. Dawladda Hoose waxa ku waajib ah oo laga rabaa inay qodobada kor ku qoran ee xubintani ka kooban tahay lagu faafiyo wageysyada lagana sii daayo Idaacadda muddo bil ah ugu yaraan iyo mar kasta oo loo baahdo.

**Qodobka 83aad**
**Heegan Galinta Farmasiiyada.**

Habaynta kaltanka famasiiyada iyo heegan galinta Rugaha Caafimaadka, Dabdamiska, Korontoda, Biyaha iyo Kaalmaha Shiidaalka ee heer Degsiimo iyo Guud ahaanba Degmada, waxaa dajinaysa Dawladda Hoose.

**Qodobka 84aad**
**Ilaalinta Sicir Goynta.**

Golaha Deegaanka waxa ka mid ah waajibaadka saaran sicir goynta iyo ilaalinta quutal daruuriga ha noqdo mid caydhiin, mid basil, Jimlad iyo miisba (6) lixdii biloodba, hal mar hadba dhaqdhaqaaqa korodhka iyo hoos u dhaca sarifka hadba heerka uu joogo.

**Qodobka 85aad**
**Kala Xadaynta Meheradaha Ganacsiga & Kala Habayntooda.**

1. Kala saarista hawlaha, waajibaadka iyo xuduudda ay kala leeyihiin ganacsatada kala ah: -
a) Soo dejiyaha badeecadaha iyo dhoofiyaha ("Importer and Exporter" Jumlad

iibiye Whole Saler
b) Tafaariiq iibiye "Retailer".
2. Golaha Deegaanka ee Degmadu waxay leeyihiin xaqiijinta kala habaynta iyo xadaynta xuduudaha darajooyinkooda liisamada Ganacsiga iyadoo loo raacayo sida uu dhigayo Xeerka Kala-xadaynta Ganacsiga (Xeer Lr. 26 /2014).

### Qodobka 86aad
### Hay'adaha Maxaliga.

a) Hay'adaha maxaliga ah Qandaraaslayaasha ee ka soo qaata dhisme mashaariic horumarineed sida MCH, Dugsi, Saldhig Boolis, Sariibad, Hangar I.W.M, kama dhisi karaan xaafad ama goob aan Dawladda Hoose ugu jirin jaangoynta.
b) Shardi waxaa ah in marka hore lagala xidhiidho Dawladda Hoose ee Degmada, kaalinta baahida dhismahaas ka jirrto iyo goobta loo qoondeeyey.

## CUTUBKA 10AAD
## MIISAANIYADDA GOLAYAASHA DEGMOOYINKA

### Qodobka 87aad
### Dakhliga.

1) Dakhliga golayaasha degaanka ee degmooyinku waxa uu ka kooban yahay (Revenue of District councils)
   a) Dakhliga degmooyinku soo saaraan (own source Revenue)
   b) Dakhliga dawlada dhexe siiso ama u qabato degmooyinka (Intergovernmental Fiscal Transfer)
   c) Deeqaha iyo kaalmooyinka kale, iyo
   d) Daymaha inta sharcigu u ogol yahay, si waafaqsan qodobka 90aad ee xeerkan.
2) Dakhliga ay degmooyinku soo saaraan ee ku xusan xubinta 1aad xarafka (a) ee qodobkan, waxa uu ka kooban yahay ka ay ka hesho ilahan:
   a) Cashuurta liisamada ganacsiga ay bixintooda awoodda u leeyihiin
   b) Cashuurta calaamadaha ganacsiga yar yar
   c) Cashuuraha Digada Xoolaha (Iibka Xoolaha)
   d) Cashuurta iibka Hargaha & Saamaha
   e) Cashuur Dhismayaasha iyo Ardiyadaha Dhulka
   f) Cashuurta beeraha (Beer-roobaadka, Beeraha waraabka)
   g) Cashuurta Dejinta Badeecada
   h) Cashuurta maalmeedka Suuqa
   i) Cashuurta Maaweelada (riwaayadaha,filimada, ciyaaraha iwm)
   j) Cashuuraha Dalaga Dalka
   k) Cashuurta kala wareejinta hantida guurtada iyo maguurtada
   l) Cashuurta xadhkaha iyo qoryaha laydhka iyo isgaadhsiinta.
   m) Ajuurada Aqoonsiga Muwaadinka
   n) Ajuurada Shahaadada Dhalashada, dhimashada, guurka iyo furriinka
   o) Ajuurada Waraqada Qoyska
   p) Ajuurada Degenaanta
   q) Ajuurada Naqshadaha,
   r) Diiwan Gelinta Sanadka ee Gaadiidka Dadweynaha
   s) Khidmada Qashin Gurka,

t) Khidmada Gaadiidka Boosteejada (istaanada)
u) Khidmada Kawaanka iyo Gawraca Xoolaha
v) Khidmada adeega baarkinada gaadiidka (street vehicle parking meters)
w) Kirooyinka (Kirada Suuqyadda, kirada Guryaha dawlada hoose)
x) Ganaaxyada, iyo
y) Hantida dawlada hoose iibiso

3) Dakhliga dawlada dhexe siiso ama u qabato degmooyinka (Intergovernmental Fiscal Transfer) ee ku xusan xubinta 1aad xarafka (b) ee qodobkan waxa ka mid ah;
a) Dakhliga dawlada dhexe siiso degmooyinka ee ah qadarka cashuuraha kastamada (Revenue Sharing in CG (10%)
b) Dakhliga dawlada dhexe siiso degmooyinka ee ah qadarka ay ka helaan miiisaniyada guud ee loo yaqaano kabka (12.5%).
c) Dakhliga laamaha dawlada dhexe ee adeegyada heer degmo (Decentralized Service Delivery) oo loo daadajinayo degmooyinka marka lagu wareejiyo maamulka adeegyadaasi degmooyinka.

4) Deeqaha iyo mucaawanooyinka ku xusan xubinta 1aad xarafka (c) ee qodobkan, waxa ka mid ah;
a) dakhliga ay ka hesho hay'adaha qaramada midoobay, kuwa caalamiga iyo kuwa maxaliga ah, iyo
b) Kaalmooyinka kale ee ay helaan. qodobkan, waa daymaha ay degmooyinku u qaataan si waafaqsan qodobka 90aad ee xeerkan.

5) Daymaha ku xusan xubinta 1aad xarafka (d) ee qodobkan, waa daymaha ay degmooyinku u qaataan si waafaqsan qodobka 90aad ee xeerkan.

6) Nidaamka Xisaabaadka iyo habka xisaab-xidhka Dawladaha Hoose waxay u gudbinayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Gudidda Ilaalinta iyo Dabagalka u qaabilsan Golaha Wakiilada.

## Qodobka 88aad
## Dibu U Habeynta Cashuuraadka

1) Maadaama ay ku kala tagsan yihiin Gobollada iyo Degmooyinku dhinaca dabiicada, Nolosha ijtimaaciga ah, Ganacsiga, wax soo saarka, istraatiijiyadda Deegaan, Darajooyinka, Adeegyada Arrimaha Bulshada iyo Dekhligaba, loona soo doortay Goleyaal Deegaan oo ah madasha xeer dejinta u gaarka ah, isla markaan laga duulayo hoos u daadajinta Maamulka "Decentralization" waxayna awood u leeyihiin dejinta Tacriifada Khidmadaha u gaarka ah oo ku salaysan qiimeyn.

2) Gole kasta oo deegaan wuxuu awood u leeyahaay inay xadidaan tacriifahooda, kordhiyaan, dhimaan ama wax ka badalaan Waxayna ku soo saarayaan xeer- hoosaad.

3) Tacriifadaha ku xusan farqada 2aad ee qodobkan, waxa uu dhaqan galayaa marka Golaha Wakiilladau ansixiyo faafinta rasmiga ahna ku soo saaro.

4) Golaha Wakiillada ayaa awood u leh ogolaanshaha, Ansixinta, diidmada iyo talo ka soo jeedinta wax ka beddelka dibu-habaynta cashuuraha.

5) Xoolaha dhoofka ah waxa Ia siinayaa Xaashida Jid marka (Transit Chit), Waxa mamnuuc ah in Neef Ia cashuuray, kuna jira mudada Jidmarka (Transit), karaa markii iib labaad dhaco. Neefka ku sugan Degmo kale oo aan ahayn Degmadii jidmarka bixisay.

6) Neefka kasta oo la cashuuroba waa in Ia dabaaqadiyaa, loona jaraa Juwanka marag furka cashuur bixinta.

7) Cashuurta Hargaha iyo saamaha waxa la qaadayaa iibka u horeeya oo keliya.

Waxayna kala mid yihiin Xaashida Jid marka (Transit Chit) Xoolaha.

## Qodobka 89aad
## Nidaamka Qoondaynta Dakhliga Kabka (12.5%)

1) Dakhliga dawlada dhexe siiso degmooyinka ee ah qadarka ay ka helaan miisaniyada guud ee loo yaqaano kabka (12.5%), waa in loo qaybinayaa degmooyinka iyada oo lagu salaynayo noocyada darajooyinka kala duwan ee degmooyinka iyo shuruudaha (Criteria) ay ka mid yihiin tirada dadweynaha degmada, baaxada dhulka ay ku fadhido degmadu iyo dakhliga ay soo saaraan.
2) kabka dawladaha hoose laga siiyo miisaaniyada qaranka oo dhan (12.5%) waxaa loo raacayaa jaantuska shaxda hoos ku muujisan Kaas oo ay ku salaysan degmooyinka derajooda iyo qoondaynta percentka uu ka helayo:

| No | Derejada | Qoondaynta (Percentage %) |
|---|---|---|
| 1 | Degmooyinka Derejada A | 6% |
| 2 | Degmooyinka Derejada B | 2% |
| 3 | Degmooyinka Derejada C | 3% |
| 4 | Degmooyinka Derejada D | 1.5% |
| | | 12.5% |

## Qodobka 90aad
## Diyaarinta Miisaaniyadda

1. Golaha waxa waajib ku ah inuu diyaariyo Miisaaniyad Sannadeedkiisa (3) Bilood ka hor inta aan Sannadku bilaabmin (September kasta) loona gudbiyo wasaaradda arrimaha gudaha si loogu soo saaro wareegto wasiir dhaqan galkeeda iyadoo nuqulna la siiyo wasaarrada horumarinta maaliyada si loogu daro miisaaniyada guud ee dawlada si waafaqsan habka diyaarinta Miisaniyada ee ku cad xeerka maamulka iyo maaliyada Xeer LR.75/2016.
2. Miisaaniyadaa waxaa lagu muujinayaa:
   a) Ku talagalka Dakhli ee Sannadka soo socda.
   b) Ku talagalka kharash ee Sannadka soo socda.
3. Miisaaniyadda waa inay muujisaa madax iyo madax- xigeenno tilmaamaya Dakhli iyo kharash.
4. Goluhu marka uu Miisaaniyadda ansixiyo, waxa uu u soo gudbinayaa Wasaaradda Arrimaha Gudaha, si loogu gudbiyo wasaarada horumarinta maaliyada, looguna daro miisaaniyada qaranka.
5. Haddii Wasiirku ku arko wax ka qaldan qaab ahaan ama aan Waafaqsanayn habka Miisaaniyad samaynta iyo sharicga Xisaabaadka wuxuu xaq u leeyahay inuu ku celiyo, isaga oo talo iyo Tilmaamo raacinaya.
6. Miisaaniyada golayaasha ee degmooyinka darajada "A" oo aanay ku jirin dakhliga/miisaaniyada ay ka helaan dawlada dhexe iyo deeqaha hay'adaha caalamiga ah, waxa waajib ah in ay ugu yaraan 30% loo qoondeeyo mashaariic horumarineed.

## Qodobka 91aad
## Dib U Eegis Miisaaniyadeed.

1. Dib u eegis miisaaniyadeed waxa la samayn karaa (6) bilood ee sannadka ugu dambeeya (laga bilaabo kawda bisha julaay) haddiii dakhli korodh yimaado.
2. Dakhli korodhka waxa lagu jihaynayaa mashaariicda horumarinta oo kaliya.

## Qodobka 92aad
## Xisaab Xidhka Golaha Degmada.

1) Xisaab xidhka Golaha Degmada ha noqdo mid Bileed, Saddex Bilood, iyo hal sannoba waa in xoghaya dawlada hoose u soo gudbiyaa:
   a) Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo leh hubinta in la fuliyay qorshaha miisaaniyada iyo mashaariicda isla markaana u sii gudbinaysa Xisaabiyaha Guud ee Qaranka si uu ugu gudbiy Hanti-dhawrka Guud.
   b) Hantidhawrka Guud ee Qaranka ee ku leh awooda hanti dhawr si sharciga waafaqsan.
2) Xisaab xidhka Miisaaniyada dawladaha hoose waxa lagu soo darayaa Warbixinta Xisaab xidh-sanadeedka uu hanti-dhowraha guud u soo gudbiyo Golaha Wakiillada si waajibkiisa dastuuriga ah uga guto.

## Qodobka 93aad
## Kala Wareejin Lacageed.

1. Kala wareejin lacageed oo madax-xigeenada dhexdooda ah waxa la samayn karaa 6da bilood ee sannadka ugu dambeeya ansixinteeda waxaa iska leh golaha degaanka ee degmadda, kadib marka ay sidaa u soo gudbiyaan xubnaha gudida fulinta ee degmadu. Waxa Loo Gudbinayaa Wasiirka Wasaaradda Arimaha Gudaha, Waxayna Dhaqangal noqoneysaa marka Wasiirku Ansixiyo.
2. Wax kala wareejin ah laguma samayn karo madax- Xigeenada khuseeya mashaariicda la xidhiidha horumarinta.

## Qodobka 94aad
## Deynta.

a) Xubnaha Gudida Fulinta, Guddida Joogtada ah iyo Golaha Degaankuba awood uma laha inay galaan kharash ka baxsan Miisaaniyadda, oo sababa Deyn lagu yeesho Golaha.
b) Mas'uuliyiinta saxeexa kharashka u idman ee galay kharash ka baxsan Miisaaniyadda, iyaga ayaa ka mas'uul ah Deynta ay galeen, loona raacayaa, loomana dooran karo mar labaad Guddoomiye (Maayar)
c) Waxaa Guddiga fulinta iyo mas'uuliyiinta maamulkaba ka reeban inay dadweynaha, Hay'adaha Dawladda, Shirkadaha I.W.M. ka galaan Deyn aanay lacageedu Miisaaniyadda ku jirin.
d) Haddii timaado duruufo degdeg ah, sida aafooyinka dabiiciga ah ama arrimo Nabadgelyo oo u baahan dhaqaale, Miisaaniyaddana aan ugu jirin, Gudida Fulinta ee Degmada waxaa u furan inuu qaato go'aan uu ku daboolo Deyn lacageed, oo daboosha baahidaas, go'aankaasi oo ay shardi tahay in laga ansixiyo Golaha Deegaanka ee Degmada ka hor inta aan la galin daynta isaga oo ogolaansho uga helaaya Wasaaradda Arrimaha Gudaha.
e) Deynta ku Xusan Xarafka (d) ee Qodobkan waa in Goluhu ku soo Celiyaa Muddo aan ka badnayn laba Sannadood, oo ah sanadka ay daynta galeen iyo Sanad-

miisaaniyadeedka xiga.
f) Daynta ku xusan xarafka (D) ee qodobkan goluhu ma qaadan karaan Sannadka ugu dambeeya ee muddo xiloodkooda.

## Qodobka 95aad
## Xeer Nidaamiyaha Xisaabaadka Iyo Kaydka Hantida Golaha.

1. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa u dajinaysa Golaha Deegaanka Xeer Nidaamiye u gaar ah Xisaabaadka Golaha Deegaanka oo ah "Double Entry System".
2. Nidaamka xisaabaadka iyo maamulka makhasinada waxa lagu dhaqmayaa shuruucda iyo xeerarka Qaranka.

## Qodobka 96aad
## Awoodda Saxeexa Kharash Bixinta Iyo Hantida Kaydka Golaha

a) Awooda Saxeexa kharash Bixinta iyo hantida kaydka Golaha, Waxaa leh Duqa Degmada iyo Xoghayaha Fulinta iyo Cidda ay u igmadaan.
b) Xoghayuhu asaga ayaa Xagga farsamada iyo waafajinta kharashyada dhinaca shuruucda iyo Miisaaniyadaha iyo Dakhligaba si gaar ah ugu idman Golaha.
c) Haddii isqabad ka yimaado awoodaha ku xusan Xarafaha (a) iyo (b) ee Qodobkan, Xoghayuhu waxa u fulinaya amarka Duqa, marka uu Duqu amar qoraal ah sidaas ku bixiyo. Wixii ka yimaadana Duqa ayaa ka mas'uul ah.
d) Xoghayuhu wuxuu xaq u leeyahay inuu qoraalkii Duqa iyo waxa uu ka qabo oo qoraal ah uu soo hordhigo gudiga joogtada ah ee dawlada hoose islamarkaana u warbixin u soo gudbiyaa Gudoomiyaha Gobolka iyo Wasiirka Wasaarrada Arrimaha Gudaha.

## Qodobka 97aad
## Guddoonka Deeqaha.

1. Goluhu wuxuu guddoomi karaa deeq kasta oo uga timaada: -
   b) Dawladda dhexe
   c) Hay'addaha Caalamiga ah
   d) Dadweynaha ama jaaliyadaha.
   e) Hay'addaha Maxaliga ah iyo
   f) Shirkadaha dibada iyo Gudaba.
2. Deeqahaasi oo noqon kara, lacag, qalab, Gaadiid, Guryo iyo hadiyad sharafeed nooc kasta
3. Deeqahaas waxay ka mid noqonayaa hantida Dawlada hoose waana la diiwaan galinayaa iyadoo warbixinta diiwaan gelintooda loo soo gudbinayo Gudoomiyaha Gobolka iyo Wasaarrada Arrimaha Gudaha.

## Qodobka 98aad
## Xaraashka Hantida Deegaanka.

1. Haddii dan guud loo arko in la Xaraash hanti Guurto ah oo ka mid ah Hantida Dawlada hoose leeyahay, waxaa xaraashkiisa oggolaanaaya Golaha Degmada ka dibna waxa loo gudbinayaa Gudoomiyaha gobolka oo ugu gudbinaya Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha oo ku soo saaraya wareegto Wasiir ka dibna waxaa loo gudbinayaa Gudoomiya

Gobolka iyo Guddida Qandaraaska Dawlada hoose si loo naadiyo.
2. Shardise waxa ah in Guddi sannadeedka baadhista, kormeerka iyo hubinta Hantida Golaha (Annual Board of survey) tallo ku soo jeediyaan kuna soo caddeeyaan warbixintooda nooca hantida in la xaraasho u baahan oo faahfaahin sababaysan leh iyadoo nuqulna loo gudbinayaa Gudoomiyaha Gobolka iyo Wasaarrada Arrimaha Gudaha.
3. Dakhliga ka soo baxa hantida guud ee la xaraashay waa in dib loogu celiyaa degmadi oo ay ka muuqataa miisaniyada degmada nuqul warbixintaas ahna loo gudbinayo Gudoomiyaha Gobolka.
4. Dhulka iyo dhismayaasha dawlada hoose leedahay waxaa loo raacayaa iibkooda si waafaqsan qodobka **31aad** farqadiisa 2aad ee xeer **No. 17/2001** xeerka maamulka dhulka magaalooyinka, dakhliga ka soo baxa hantida guud ee la iibiyay waxaa la waafajinayaa sida ku cad farqada 31aad ee isla qodobkan.

## Qodobka 99aad
## Guddi Sannadeedka Kormeerka Iyo Baadhista.
## "Annual Board of Survey"

1. Guddi sannadeedka kormeerka iyo baadhista hantida Golaha Degmada waxaa magacaabaaya Guddoomiyaha Gobolka, waxaana la magacaabayaa Sannad kasta bilawgiisa Bisha koowaad horaanteeda, (Guddi madax banaan).
2. Xubnaha Gudidu waxay ka koobnaan doonaan (5) xubnood oo kala ah 3 golaha deegaanka ah iyo 2 xubnood oo gobolka ah.
3. Qoraalka magacaabista guddi sannadeedka baadhista hantida golaha Waxaan nuqul la siinayaa Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Hantidhawrka Guud Ee Qaranka.
4. Guddi sannadeedka baadhistu xubin kuma leh Hantidhawrka Guud ee Qaranku.
5. Sidoo kale saraakiisha ka mas'uulka ah hantida la kormeeraayo kama mid ah guddida balse waa in ay goob joo ahaadaan marka rugahooda la kormeeraayo.
6. Guddida baadhistu waa inay natiijada kormeerkooda oo qoraal ah si aan dib u dhac lahayn ugu soo gudbiyaan, Guddoomiyaha Gobolka, Duqa Degmada, Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyadoo nuqulka Asalka ah loo soo diraayo Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Faahfaahinta qoraalka oo u kala baxaysa sidatan:
   a) Hantida dhiman ama la waayey.
   b) Hantida dheeraadka leh.dhawrsanaanteeda amba haddii dayac ka muuqdo
   d) Hantida xaraashka u baahan amba in la sii iibiyo ee la marinaayo qaabka qandaraas bixinta iyo naadinta.
   e) Hanti loo duwi karo ka faa'iidaysiga isticmaalka dan guud ama deeq ahaan lagu wareejin karo hay'ad kale sababaha dan guud awgeed.
   f) Gubid iyo baabiin.

## Qodobka 100aad
## Mas'uuliyadda Xisaabeed.

Kharashka sharcigu oggol yahay ka sokow mas'uulkii ama golaha amra amba bixiya kharash aan waafaqsanayn sharciga waa in uu soo celiyaa, isaga ayaana ka mas'uul ah iyada oo la raacaayo sharciga ilaalinta hantida Qaranka.

## Qodobka 101aad
## Kormeerka Iyo Baadhista.

1. Wasaaradda Arrimaha Gudaha ayaa awood u leh kormeerka iyo baadhista Hantida, shaqada iyo hubinta fulinta shuruucda, Xeerarka iyo Siyaasadda Guud ee Qaranka. Sidoo kale Hanti Dhawrka Guud ayaa u xil saaran baadhista maamulka iyo maaliyadda Golaha Degmada.
2. Golaha Wakiilada iyo Gudiyadiisu waxay u yeedhi karaan, waxna ka waydiin karaan, isla markaana kormeer iyo baadhis ku samayn karaan Maayirada Dalka iyo Golayaashooda Degaanada.

## Qodobka 102aad
## Heshiisyada Iyo Qandaraasyada.

1) Nidaamka qandaraas bixinta ee golayaasha degaanka degmooyinka waxa loo raacayaa xeerka qandaraasyada qaranka.
2) Golaha Degaanka ee Degmooyinka waxa ku waajib ah in ay u maraan hab qandaraas iibkasta, dhismekasta, iyo adeegkasta oo qiimihiisu ka badan yahay qiimaha ku xusan xeerka qandaraasyada qaranka. Waxayna ku war galinayaan Guddida Qandaraasyadda Qaranka.
3) Haddii iibka, dhismaha, iyo adeegu uu qiime ahaan ka yaryahay qiimaha farqada sare ku xusan, Golaha Degaanka ee Degmada ayaa awood u leh, waxase shardi ah in loo maro nidaamka qandaraas bixinta ee xeerka qandaraasyada.
4) Golayaasha degaanka ee degmooyinku waxay yeelanayaan Guddida Qiimaynta Naadooyinka iyo Codsiyadda, iyo faracayada ama waaxda Qandaraasyada, kuwaasi oo yeelanaya Shaqooyinka iyo hawlaha ku xusan xeerka qandaraasyada qaranka.
5) Golayaasha degmooyinku waxay awood u leeyihiin in la galaan heshiis cida ku guulaysata heshiiska ka dib marka marka tartanka qandaraasku soo gaba- gaboobo laguna dhawaaqo cida ku guulaysatay.
6) Dawladaha Hoose waxay heshiisyada iyo qandaraasyada u gelayaan si madax bannaan isla markaana waafaqsan Xeerka Qandaraasyada Qaranka
7) Dawladaha Hoose waxay Guddida Qandaraasyada Qaranka la kaashanayaan habka qabashada qandaraasyada iyo tababarada la xidhiidha baahinta qandaraasyada.

## Qodobka 103aad
## Dhaqangalka Iibka.

Hanti kasta (Guurto iyo ma guurto) oo la kala iibsanayo, la isku wareejinayo, la isku hibaynayo ama la isa siinayo ee ku jira xadka Degmadda, heshiiskii laga gala ama laga gaadho ansax noqon maayo (ma noqonayo) haddii maamulka Dawladda hoose ee Degmadu aanay oggolaanin islamarkaan aan lawaafajin qodobka **98aad** farqadiisa 1aad iyo 4aad ee xeerkan,

## Qodobka 104aad
## Gudbinta Saxeexyada.

Tusaalaha Saxeexyada Gudida Fulina ee Golaha Degmada iyo Kaydka Saxeexyada Waxaa uu Goluhu u gudbinayaa hay'adaha ay khusayso, waxaanay nuqul ogaysiin ah siinayaan Wasaaradda Arrimaha Gudaha.

## CUTUBKA 11AAD

**ARRIMO KALA DUWAN**

**Qodobka 105aad**
**Awoodda Dawladda Dhexe.**

Awoodda iyo Waajibaadka Dawladda Dhexe ku leedahay Golaha

1. Maamulka Golahu wuxuu ka mid yahay maamulka xukuumada wuxuuna toos u hoos imanayaa Wasaradda Arrimaha Gudaha oo ku leh waajibaadkan iyo Awoodahan:
   a) Sugidda Amaanka iyo ilaalinta Nabadgalyada.
   b) Soo gudbinta gudida qaran ee naqshadaha guud codsiyada ku saabsan dib u habaynta Naqshadda magaalooyinka Degmada iyo wax ka badelkeeda, si waafaqsan xeerka maamulka dhulka.
   c) Ansixinta iyo oggolaanshaha abuuridda iyo dhismaha Degsiimooyinka Cusub ee hoos yimaadda Golaha Degmada.
   d) Kormeerka iyo hubinta habsami u socodka hawlaha maamulka Golaha Degmada.
   e) Sugidda iyo u kuur galka fulinta Shuruucda, Xeerarka iyo dhaqangalka amarada ka soo baxa Goleyaasha Dastuuriga ee Qaranka.
   f) Hagida iyo ku hogaaminta Siyaasadda Guud ee Qaranka.
   g) Kala xadaynta xuduudaha Degsiimooyinka hoos yimaadda Gobollada iyo kala xadaynta Degmooyinka kale.
   h) Jaangoynta, qorshaynta iyo raadinta maalgelinta mashaariicda horumarineed ee heer caalami iyo kuwa Dawladda Dhexe
   i) Dajinta barnaamijka iyo siyaasadda fidinta maamulka.
   j) Magacaabista Guddiyaal hawl cayiman iyo magacaabista Saraakiil, iyo arrimaha kale ee Dastuurka JSL iyo Xeerkani Awoodda u Siinaayo.
2. Waxaa reeban in ay Xukuumaddu soo saarto wareegto ama amar burinaya ama is hortaagaya fullinta iyo ku dhaqanka qodob ama qodobo ka mid ah xeerkan kadib markuu dhaqan galo.
3. Haddii ay dhacdo arrinta faqradda labaad kuu xusan ee qodobkan waxay ciqaabta kadhalataa gaar u noqonaysaa masuulkii amarkaa bixiyay ama wareegtadu kasoo baxday ishortaaga ahi.

**Qodobka 106aad**
**Soo saarista xeer nidaamiyeyaal**

Wasiirka Wasaarada Arrimaha Guduhu wuxuu soo saarayaa xeer-nidaamiye iyo hagayaal tilmaamaya dhaqan galka xeerkan.

**Qodobka 107aad**
**Awoodda Guddiyada Baarlamaanka Guddiyada**

Golayaasha Baarlamaanku waxay awood u leeyihiin dabagalka, la socodka hawlaha Gobolada iyo Dagmooyinku u xil saaran yihiin, iyagoo u yeedhi kara waxna ka waydiin kara hawlaha iyo waajibaadka ay umadda u hayaan, iyagoo cuskanaysa qodobka 53aad farqadiisa 7aad ee Dastuurka qaranka JSL.

**Qodobka 108aad**

## Baabi'in Ama Laalid

1. Waxa halkan lagu laalay Xeerka Is-maamulka Gobolada Iyo Degmooyinka ee **Xeer Lr: 23/2002**, ee la dhaqan-galiyay **24/06/07**. Xeerka Tacriifadaha Midaysan Ee Cashuuraha Dawladaha Hoose Ee Xeer **Lr: 12/2000**, iyo dhammaan qodobbada ku jira xeerarka dhaqan-galka ah ee jidaynaya cashuuraha heer degmo ee ay dawladda dhexe qaaddo sida Qodobka **69aad** iyo qodobada kale ee xeerarka dhaqangalka ah ee ka hor imanaya xeerkan iyo sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon Karin xeerkan, waxaana mas'uuliyaddaasi u gaar noqonaysaa dawladaha hoose sida waafaqsan qodobka **112aad** ee Dastuurka, iyo qodobka 40aad ee Waxka-beddelka iyo Kaabista Xeerka Is-maamulka Gobollada iyo Degmooyinka Xeer.**Lr.23/2002**
2. Heerka qaadista Cashuuraha Heer Degmo ee ay Dawladaha Hoose qaadayaan waxay ku ekaanaysaa xadka cashuureed ee u gaarka ah si la jaan-qaadaysa hadba inta ay ka hanan karto.

## Qodobka 109aad
## Dhaqan Galka

Xeerkan wuxuu dhaqangalayaa marka ay ansixiyaan golayaasha sharci dajintu (Wakiiladda iyo Guurtida), Madaxweynuhuna saxeexo isla markaana ku soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Qaranka.

| | |
|---|---|
| **C/risaaq Siciid Ayaanle**<br>**Xoghayaha Guud ee Golaha**<br>**Wakiilada JSL.** | **Baashe Maxamed Faarax**<br>**Guddoomiyaha ee Golaha**<br>**Wakiilada JSL.** |